HEES HAWLEEDDO

Chansons de Travail Somaliennes



HOOBAANTA AFKA HOOYO

Par
Said AHMED WARSAMA

AGENCE DE COOPERATION CULTURELLE ET TECHNIQUE

I.S.E.R.S.T. 2ème ÉDITION

@SOMALIBOOKS



I.S.E.R.S.T.
B.P. 486
FAX. 35 48 12

Traduit par

Aidid ADEN GUEDI
et
Abdi ELMI ASHKIR

Illustrations de

Khalil EL MASRI

Impression

MULTIPRESS DJIBOUTI

HEES HAWLEEDDO

Chansons de Travail Somaliennes

HOOBAANTA AFKA HOOYO

Par
Said AHMED WARSAMA

AGENCE DE COOPERATION CULTURELLE ET TECHNIQUE

I. S.E.R.S.T.

2ème ÉDITION

@SOMALIBOOKS



TUSMO
TABLES DES MATIÈRES

PREFACE
HORDHAC «AVANT PROPOS» *V À XII*

QAYBTA KOWAAD : HEES LO'AAD.
CHANTS EN L'HONNEUR DES VACHES.

BOGGA
PAGE *1 À 64*

QAYBTA LABAAD HEESAHA ISHIN KA SIMANKA AH.
DEUXIÈME PARTIE, CHANTS EN L'HONNEUR DES BOVINS ET CAMÉLIDÉS

BOGGA
PAGE *65 À 122*

QEEXIDDA ERAYADA.
LEXIQUE

BOGGA
PAGE *123 À 139*

TIXRAACA QORAALADA.
BIBLIOGRAPHIE *140 À 142*

MAGACYADA DADKAAN WARAYSANNAY.
PERSONNES CONSULTÉES.

@SOMALIBOOKS

Hoobaanta Afka Hooyo

(Les Fruits Murs de la Langue Maternelle)

par

Said Ahmed Warsama

PREFACE DE LA PREMIERE EDITION

La tâche entreprise par Said Ahmed Warsama en écrivant Hoobaanta Afka Hooyo» (les fruits mûrs de la langue maternelle) est vraiment digne d'éloge. En collectant la poésie traditionnelle des pasteurs somalis de la République de Djibouti, il l'a préservée pour les générations futures de ses concitoyens et l'a rendue accessible au monde extérieur, puisque ce qui a été écrit peut être à tout moment traduit. Il convient de louer l'auteur d'avoir pourvu son recueil d'un lexique d'annotations qui doit couvrir tous les mots archaïques, désuets ou hautement spécialisés, lesquels autrement, risqueraient de n'être pas entièrement compris par les jeunes.

Les poèmes sont placés dans leur contexte social et écologique d'une manière qui rehausse encore à leur valeur en tant que documents. Le livre fournit en effet des vues étendues sur le mode de vie et de pensée de la société qui a produit cette intéressante et belle poésie.

Il est à souhaiter que cette publication soit la première d'une série consacrée à l'étude des cultures de la République de Djibouti, à la fois par Said Ahmed Warsama lui-même ainsi que par d'autres compatriotes qui pourraient s'inspirer de ce digne exemple que constitue «Hoobaanta afka hooyo».

Il faut féliciter l'ISERST de son initiative en publiant le livre qui mérite certainement son appui.

B.W. Andrzejewski,
professeur de langues
et littératures couchitiques
à l'université de Londres.

HOOBAANTA AFKA HOOYO

(The ripened fruit of the mother tongue)

By

Said Ahmed Warsama

PREFACE TO FIRST EDITION

The task which Said Ahmed Warsame has under taken in writing «Hoobaanta Afka Hooyo» (the ripened fruit of the mother tongue) is highly praiseworthy. By collecting the traditional poetry of the Somali pastoralists of the Djibouti Republic he has preserved it for the future generations of his co-citizens, and made it accessible to the world outside, since that which is published can readily be translated. In this connection the author must be commended for providing the text with lexical annotation which cover those archaic, obsoloscent or highly specialized words which might not otherwise be fully comprehensible to younger people.

The poems are placed in their social and ecological setting in a way adds to their value as documentation; the book provides us, in fact, with far-reaching insights into the way of life and modes of thought of the society which produced this beautiful and interesting poetry.

It is to be hoped that this publication heralds further contributions to the sutdy of the cultures of the Djibouti Republic, both Said Ahmed Warsame himself and by others of his compatriots who might be inspired by the worthy example of «Hoobaanta Afka hooyo»

ISERST is to be congratulated on its initiative in publishing this book, which certainly deserves its support.

B.W.Andrzejewski,
professor of cushitic
languages and literatures
in the university of London.

@SOMALIBOOKS

Hoobaanta Afka Hooyo

(The ripened fruit of the mother tongue)

by

Said Ahmed Warsama

PREFACE TO SECOND EDITION

Livestock is the Somalis greatest economic resource and the mainstay of their lives. Numerous studies have shown how Somalis use their eloquent and widespread poetry to teach about pastoral life. There is a shortage, however, of reliable information about other oral devices that Somalis use to transmit knowledge about livestock husbandry and nomadism. This revised and expanded edition of Said Ahmed Warsama's collection of work songs is, therefore, a welcome addition to Somali literature and language studies.

In this collection we can read - even hear - the wisdom of the work songs and texts while giving water. Songs provide a pleasurable distraction that reduces the drudgery of the difficult tasks of successful nomadism. Scientific understanding is founded on the belief that knowledge inevitably progresses but new and improved knowledge does not necessarily drive out the old. American dairy farmers discovered that playing classical music to their animals while milking them significantly increased production. Perhaps in a similiar manner, Somalis use their voices to encourage more efficient livestock watering.

*They composed these chants and songs with melodies that vary from one species to another. The first group of songs (*1-*52) adresses the needs of cattle; the second section (*53-100) is concerned with camels and cattle. The tempos, rhythms and contents of the songs demonstrate the practical and artistic concerns that Somalis have for their livestock. This research by Said Ahmed Warsama preserves oral wisdom and lore, enabling us to appreciate the skills and ingenuity of the people who created it.*

Charles L. Geshekter

Professor of African History

California State University

Chico, California

@SOMALIB

Hoobaanta Afka Hooyo

(Les Fruits Murs de la Langue Maternelle)

par

Said Ahmed Warsama

PREFACE DE LA SECONDE EDITION

Le cheptel est la plus grande ressource économique des Somalis et le fondement de leur vie. De nombreuses études ont révelé la manière dont les Somalis utilisent leur éloquence et cette poésie reputée pour enseigner la vie pastorale. Il y a, néanmoins, un manque d'informations fiables quant aux autres modes de transmission du savoir, relatifs à l'élévage et au nomadisme. Désormais cette édition revue et complètée du recueil des chants de travail de Mr. SAID AHMED WARSAMA est une contribution importante à l'étude de la litterature et de la langue somalies.

Dans ce recueil on peut lire - voir - entendre - la sagesse des textes et chants de travail lors de l'abreuvage du cheptel. Les chants offrent une plaisante distraction attenuant la rudesse de ces tâches difficiles du nomadisme épique. L'intelligence scientifique soutient que la croyance dans le savoir progresse inévitablement mais un savoir nouveau et élargi n'occulte pas forcement l'ancien. Les fermiers américains ont découvert que la production laitière s'accroîssait chaque fois que la traite était accompagnée d'une musique classique. D'une manière similaire, les Somalis sembleraient, grâce à leurs mélodies, encourager efficacement de cette façon l'abreuvage du cheptel.

Les melodies varient d'un genre à un autre. Le premier groupe de chants (1 à 52) Concerne les bovins. La seconde partie des chants (53 à 100) s'adresse aussi bien aux bovins qu'aux chameaux..

Les tempos, les rythmes et les contenus de ces chants traduisent l'intérêt pratique et la dimension artistique que les Somalis portent à leur cheptel. Cette recherche de Mr. SAID AHMED WARSAMA préserve la sagesse orale et le savoir, et nous permet d'apprécier l'habilité et l'ingénuité du peuple qui les a enfantées.

Charles L. Geshekter

Professor of African History

California State University

Chico, California

HORDHAC

Soomaalida, inteeda badani waa xoolo dhaqato ku nool oontooda. Si fiicanna u awoodda afgarashdood, baahidood iyo kolba sida dhaqamahood ku farsan. Marka dhaqankooda loo eegona, duunyadu waa u shan qaybood oo la isku yidhaa meesi. Kuwaas oo kala ah lo' iyo geel oo ishina, ri' iyo iyo iduhuna waa adhi, afartaa magacooda guud waa nicmoolay. Meesiga shanaadna waa gammaanka oo ay ka mid yihiin fardaha, baqlaha iyo dameeruhu.

Inkasta oo hees hawleedada hawl dad, tu duunyo, ta dhirta fooxa iyo hawla kaleba soomaalidu dhibtooda ku mooddo, ayey haddana inteeda badani duunyada saamaysaa siiba nicmoolayda, waxaana ugu tiro badan kuwa ishinka. Iyana wey kala leeyihiin heesaha shubaasha oo kala ah kuwa kamiinta iyo kuwa marriska, ta hoyaadku se geelay u gaar tahay oo lo' du la ma laha. Dadku ta marriska ee geela oo leh luuq macaan ayey aad u dhegeystaan, geeluna intuu u dhego taago ayuu si fiican uga bogtaa biyaha. Ta lo' du intey geeraarka u luuq dhawdahay ayey lo' du xiiseyn, sidaana uma danayso, ugu mana biyo cabto sida geelu tiisa ugu biyo cabo.

Dibida oo lagu beero qotto, marka aroornimada ay hawshu bilaabanto ilaa laga gaadhaayo labada galabnimo si fudud ayey u hawl galaan. Mar haddii ay daalaan se, hees iyo geeraar la' aan ma nuuxsadaan, luuqda macaan ee heestu markay u baxdo,ayey dhegaha kor u taagaan, dooni bad mushaaxaysana waaba la moodaa. Awrtana laba goor baa loo heesaa, mar waa kolka dumarku surradda iyo haamamoodka aqalka ku rarayaan. Marra waa kolka raggu safar ula ambabaxayaan, kuna baraad laayihiin raridda cuddadda. Marka hiirta la dhaqaajo, ee duhurkii laga dareemo cagajiid iyo gudoodiga habeenkii ayaa loo ma heesee geeraar lagu maaweeliyaa. Iyana cagtay hoosta ka xadaan, oo suun iyo sallaxba goor la jiidhay la ma ogaado.

Heesaha inta adhiga lagu la dhaqmaa intay kooban tahay ayey nan lahayn murti sidaa u sii qoto dheer. Gammaankana muurgaabka (Dameeraha) ayey inta ku dhaqanta u heesaan, kuwaas oo leh xoolo dhaqato iyo beeralayba. Haddii la xadeeyana, inta degta degmada jigjiga iyo ta Dirdhaba, koofurta Jabbuuti iyo gobolka Awdal, iyaa heesaha dameeraha loogu yimaad. Wayna suurtowdaa iney nan degmooyinkaa uun ku koobnayn, ee laga heli karo meelo kale.

@SOMALIBOOKS

Inkasta oo ay nicmoolaydu heesaha kamiinta kala leeyihiin, haddana in baa ka dhaxaysa ishinka, oon ugu magac daray ***ishin ka siman****. Waana kuwa lo' iyo geel toos iyo dadabtoona tilmaan midkood u gaara aan u lahayn, ee kolba kii hawshiisa lagu fooggan yahay lagaga baxo. La mana odhan karo heesahaasi waa kuwa geel, ama waa kuwa lo' aad. Hoobaanta labaadna kuwaa iyo kuwa lo' day saamaysaa, oo ku soo kooban heesaha markay kamiin cabayaan uun loo qaado, geelu se wax ku ma leh.*

Luuqda iyo dhacdada way kala leeyihiin heesaha ishinku, oo kolba kii lagu hawlan yahay ayaa tiisa loo tixgaliyaa. Qofka ka fog ee dhegtiisa ay ku soo dhacdo luuqdu wuu gartaa, kolba ka geel iyo lo' dalagiisa lagu jiro iyo qaabka hawshu tahayba. Midhuhuna waa la maso, oo ka aqoon u lihi, ta lo' da, ta geela iyo ta ka dhexaysa ee ***ishin ka simanka*** *ah wuu kala asteeyaa. Dad baa se luuqda uun ku kala sooca heesaha, oon kollaba tixgalin midhaha, una haysta in tu ka dhaxaysaaba jirin.*

Hees hawleedada duunyadu wey ka siman yihiin ku halqabsiga neef qudha, toos ula hadalka inta badan, dhinaca murtidana ta ishinka ayaa ka heer saraysa ta duunyada kale. Sidaan u sharaxnay haba yaraatee ka ma tagana ujeedooyinkii bilawgii laga lahaa. Kuwaa laga heli karaa oo leh, ujeedooyin intaa ka durugsan, kana qoto dheer, lana socon kara waayaha maanta, ka barrina dhaqankiis iyo siyaasaddiis leh.

Taasina maaha tu abwaanadii tiriyey ula danlahaayeen, waa se tu murtida margiga ihi la timid, oo ina fartay in maansada inteeda la tiriyo iyo maahmaahoba ujeedadood kolba halkay ku farsan yihiin la waafajiyo. Guud ahaan murtiyo la siman kuwa loo qoondeeyo dadka ayaa maansada inteeda la tiriyo ee duunyada saamaysa laga heli karaa, oo u badan heeso.

ISKU TABINTA HEESAHA :

Hayaanka iyo kolba meel naq iyo biyo leh raadinta ayaa reerguuraaga ku irba in kooxiba meeshii ay ku nooleyd ka tegto una gudubto meelo kale. Dhacdee in reero kale kula kulmaan meelahay u doobteen, kuwaas oo laga yaabo in iyana ka kala yimaadeen arlo ka fog halkii lagu kulmay.

Reeruhu way kala degaan, oo inta aqooni iskugu laaban tahay, wayba sii kala fogaadaan. Kulankooduna waa meelaha danta waarabku ugu jirto, oo ah kuwa kaliya ee si dadab ah la iskugu dhaafsado heesaha ku fida degmooyinka ay degen yihiin reerguuraaga Soomaaliyeed.

Kuwa heesaha aluffay la ma yaqaan. Sobabtuna waa soo jireennimadood iyo danayn la'aanta kuwii tiriyey kuwa ay ahaayeen. Inta shubaasha ku jirtaana luuqda wacan iyo jiibtaa u daran, Weyna ku muraaqoodaan, iyadaana dhaafisa culayska hawsha. Reer magaalkuna wey kala siman yihiin arintaas. Tusmaheedna, waa heesaha raadiyaha iyo telefishanka ka baxa, oo ka qaada uun si wanaagsan loo yaqaan. Tiryahana in kasta oo la maagacdhabo, la isku ma hawlo kuu yahay.

Waxaan intaa raacineynaa, in heesaha lo'da iyo kuwa ishin ka simanka ah aan u kala qaadnay laba qaybood oo gudboon. Kala horeynta qayb kasta tixaheedu waa tu aan u habeeyney sida ay xuruufta bataja'du u kala horayso. Waxaan iyana u tixgalinnay xarafka ay qaafiyadda heestu ku socoto.

Dhamaadka heesaha waxa raaca oo gadaashooda ku qoran. Erayadaan filaynay inay u baahan yihiin qeexid, iyana intoon mugdiga ka saaray baan ku qorray bogagga danbe, iyaga oo kuwa hordhacu wataan tirsiga bogagga, kuwa tixuhuna tirsiga heesaha.

UJEEDDO IYO GALADIN :

Dulucda ka danbaysa ururinta heesuhu waa mid ah dabaqabataynta hiddo warinta oo ku dhaw nabaadguur, gaar ahaan murtida xoolaha lagu la hadlo. Iyana sobabteed waa reer baadiyiha oo marba marka ka danbeya sii reer magaaloobaya. Arimaha ku taxaabay inay sidaa yeelaanna tahay, kuwa loo foodsaari karo dhawr arimood oo kala ah.

- Abaaraha is dabajoogga ah,

- Dagaalada ka socoda geeska Afrika iyo

- Baahida oo badatay, oo ka tamar-roonaatay

cullaysna saartay kuwii reer magaalka ahaa

ee kabi jiray dhaqaalahooda.

Inkasta oo ay reer badiyuhu dad magaalo wada noqoneyn, ayaa geerida ka sokow, inta qaxday mooyee inta hadhayna heesihii hore ku illaawi karaan kuwa gadaal laga tiriyey, ama se sidii abkood iskugu hawli jireen ayey nan kollaba iskugu hawlidoonin hees hawleedada. Taasna waxa loo aanayn karaa sida fudud ee xoolaha loo waraabsho, oo haraha, biyo xidheenada iyo ceelalka reer miyiga looga qodo meelaha u dhaw daaqsimahoodu ay la yimaadeen.

Dhal magaalona haba yaraatee la ma socdaan hodannin dhaqankooda. Inuu cilmi ku dhisan yahayna la ma aha, oo uu nan sina

laalaadin kuwa ummadaha kale, ee ay dhalinta qaar dooranka siiyaan. Mana oga in dadaal iyo qadarin qola kastaaba kooda ku gaadhsiisay heerka u joogo. Kuwaas baan rabnaa inaan u hurro, qaayaha iyo nuxurka dhaqankoodu u leeyahay. Si ay uga hiraan nacabka, uguna dhaataan waa in falawgeed la galaa.

Ka ka afafaa inuu liitaa yahay moron ka ma taagna. Assaagiisa reeroodna kii maamuusa ee is garab dhiga kollaba maaha. Ma garanaayo hodannimada dhaqankey leeyahay ka yidhaa, waxa ka liita ka leh, ma lihi iyo waa liitaa. Taasaana hubeysa dadnimadiis, kana maragkacaysa inuu yahay liitaa dhaqan reerood u hanaqtaaga .

Ururinta heesaha xoolaha loo qoondeeyey dad badan baa taageero iyo dhiirin deeq nooga dhigey, qaar ku gacmo seydheyna wey jireen, in loo ooman yahayna dareen guud ayaa u ahaa astaan. Adna akhristaw, taan kaa codsanaynaa waa tu ah inaanad nagaga masuugin fikradaad ka qabtid murtida isirkeen u qoondeeyey inuu isku dhaafsho halgen hawleedkuu ugu jiray daryeelka duunyada.

Waxa la ma gaasiraan ah, oo ay runtu tahay, in abwaanada iyo ku xeeldheerayaasha dhaqanka Soomaliyeed la'aantood tamartayo kollaba ay nan meel marteen.

Haddaba, kii xaraf noo shegey iyo kii na tilmaamayba dhamaantood ha naga guddoomeen mahad. Waxaan se, si gaar ah mahad ugu guntaynaa intii hawsha culeyskeedu ku dhacdey ee mar kastaba heeganka noo ahayd. Kuwaas oon ku soo koobaynno, mudnaantana aan siinayno CUMAR GOOD BUUX oo hoobaanta labaad si gaarah gacan nooga siiyey. XASSAN CILMI iyo AXMED AADAN baan iyana u mahad naqaynaa.

Prof. B.W. Andrzejewski oo ku xeel dheer afafka kushatigga, suugaanta Somaalidana si fiican u yaqaan oo daabacaaddii hore ee Hoobaanta gogoldhigeeda qoray iyo Prof. Charle L. Geshekter oo isna daabacaaddan u qoray gogoldhigga iyaa iyana mahad leh. Wassaaradda Hiddaha, dhalinta iyo ciyaaraha oo u hawlgashay kharashka lagu daabacay buuggan, ururka iskaashiga dhaqanka iyo farsamada ee waddamada ku hadla af fransiiska (A.C.C.T) oo isna bixiyey kharashka ku baxay daabacaadda. Wassaaradda arimaha gudaha iyo guud ahaan xoghaynta guud ee war isgaadhsiinta, gaar ahaanna qaybaha af Soomaaliga ee raadiyaha iyo telefishanka oon barnaamajyadooda ka faa'iideysanney iyaa iyana mahadd le. Ugu danbeynna waxaan galadinaynaa Aaden Abdillahi, Daauud Abubakar Alwaan iyo Mahamed Cilmi oo iyana wlay dib u akhriska tarjumaada.

@SOM somali-books OKS

- N. B. Intaa waxaan raacinaynaa in heesaha ishinku wadaagaan een hore ugu bixinnay laba gardaaqa, aan u garaney in la yidhaa ***ishin ka siman****. Laba gardaqana loo dhaafo sidii loo yaqaan oo ahayd xoolaha intooda daaqda geed sare iyo geed hoosaadka ama sida dadka qaar u yaqaanaan oo ah xoolaha intooda ku noolaan karta guban iyo oogaba.*

Avant - propos

Des berceuses pour enfants, en passant par les airs entonnés lors des travaux de la récolte de l'encens, les chants de travail avaient et continuent à remplir encore une multitude de fonctions chez les somalis. Mais tout en étant aujourd'hui destinés en général à libérer leurs utilisateurs de la pesanteur routinière des charges quotidiennes, ces chants avaient surtout en milieu rural, la particularité d'être l'apanage des éleveurs nomades faisant l'éloge du cheptel des ruminants domestiques appelés «Nicmoolay».

A cet égard, les pasteurs somalis possèdent pour ce qui est du vocabulaire relatif au troupeau, une nomenclature fournie, distinguant d'un côté les petits ruminants (adhi) en l'occurrence les caprins et les ovins et de l'autre les grand ruminants comprenant les bovins et les camelins regroupés sous la même dénomination. Il ne faudrait pas omettre de mentionner une dernière composante du cheptel, à savoir les bêtes de somme comme les ânes, les mulets et les chevaux désignés quant à eux sous le patronyme de «gammaan». Cet affinement qui prévaut dans la catégorisation des animaux domestiques, traduit d'une certaine manière des traditions pastorales établies. Les somalis dressent ainsi une certaine hiérarchie au sein du troupeau, hiérarchie basée sur des valeurs d'ordre affective mais qui ne sont pas dénuées de considérations économiques.

A l'heure privilégiée de l'abreuvement (shubaal) divisé en deux temps «Kamiin» et «Marris», les pasteurs entonnent des airs de circonstances autour du point d'eau, du puits, de l'abreuvoir... C'est là que les hommes et les bêtes se retrouvent dans une promiscuité qui bien qu'apparente cache en réalité derrière tout le système de l'abreuvement une division du travail basée sur la solidarité.

On commence toujours par abreuver la partie du cheptel qui nécessite le moins d'effort, c'est à dire les petits ruminants. Le moment où les bê se désaltèrent, coïncide aussi au déploiement de tout un rituel gest accompagné de chants.

Les chants de travail qui font l'objet de cette étude se réfèrent à la par du bétail revêtue traditionnellement d'un prestige social particulier,

dromadaires et les bovins (ishin).

Mais rarement ces chants s'adressent aux animaux de bâts de la catégorie des «gammaan». Si c'est le cas , alors cette aire est circonscrite aux région de Dire-Dawa et Djigjiga en Ethiopie ainsi qu'à celles situées aux confins méridionaux de la République de Djibouti et dans la région d'Awdal en Somalie.

Il n'est pas impossible d'identifier dans la panoplie de ces compositions des nuances, en fonction des thèmes abordés aux niveaux de l'éloquence, du rythme de la voix et du contenu. En général les chants ayant trait aux dromadaires sont à la fois les plus prisés et ceux dont la qualité littéraire s'impose d'emblée.

Les utilisations multiples du dromadaire génèrent donc une profusion de types de chansons faisant l'apologie de ce symbole de la fierté des nomades. Aussi lors du chargement de ce «vaisseau du désert» par les femmes pour déplacer le campement ou bien pendant l'acheminement des denrées variées par les caravanes commerciales, il est fréquent d'entendre alors dans ces circonstances précises les nomades chanter. Une fois le convoi en route, les chants s'interrompent. Puis au fur et à mesure que se fait sentir le poids de la fatigue chez le dromadaire, commence à s'élever une mélodie au rythme lancinant très caractéristique, le «geeraar».

Il existe des chants qui sont spécifiques à certains types de bétail. D'autres sont communs aux bovins et aux chameaux. Ces dernières catégories de chants nous les avons appelées «Ishin ka siman». Lorsqu'on entend ces chants, on ne peut dire avec certitude, s'ils se rapportent spécifiquement aux dromadaires ou aux bovins. Cependant, la mélodie et le rythme des chants sont aisément reconnaissables. Sont aussi identifiables, sans difficulté, les genres de travaux que ces chants accompagnent grâce aux paroles qui y sont employés.

Comme on peut le constater, en parcourant ces chants, le berger s'adresse à un animal; mais il parle aussi, au delà de ce dernier, à tous les animaux du cheptel, comme il s'adresse à tous les hommes, car ces chants relatifs aux bêtes peuvent aussi s'appliquer aux hommes. De cette polysémie des chants, découlent les multiples interprétations que l'on peut en faire.

circulation de ces chants a été favorisée par la perpétuelle he de pâturage et d'eau par des pasteurs venus des contrées es et qui se rencontrent aux points d'eau. Ils créent et échangent s chants qui deviennent anonymes.

@SOM somali-books OKS

En effet, nul ne connaît les auteurs de ces chants qu'on entonne quand on donne à boire aux bêtes et qui se caractérisent par leur harmonie et leur refrain et qui aident ces bergers à supporter la fatigue des travaux. De même les citadins aujourd'hui s'ils connaissent souvent les interprètes des chansons diffusées par la radio, ne cherchent pas à connaître les noms de leurs auteurs.

A la fin du présent recueil, le lecteur trouvera un glossaire. Plus des trois cent termes ont ainsi été réunis, accompagnés de commentaires qui constituent autant de tentatives pour les expliciter en les restituant à leur contexte initial.

Notre objectif est de collecter la littérature traditionnelle orale qui permet aux nomades de s'adresser à leurs bêtes et qui est sur le point de disparaître. Les sécheresses répétées, et les conflits armés de la Corne de l'Afrique ont accentués la dépendance des campagnes de l'arrière-pays. Cette situation de crise permanente se traduit par :

- Un exode des campagnes vers les principaux centres urbains. Car les pasteurs du fait de l'exode rural, se transforment de plus en plus en citadins déracinés. Les multiples mutations qui touchent cet univers pastoral ont été surtout préjudiciables à la perpétuation de cette tradition de chants de travail. Ainsi la multiplication des forages modernes, des retenues colliniaires ou d'autres types d'ouvrages d'une ampleur similaire ont affecté les structures de l'organisation du travail autour du point d'eau. De ce fait les conceptions et les significations antérieures chez les pasteurs nomades ont été profondément remaniées.

De plus, il n'est pas évident que les nomades restés chez eux, s'intéressent comme leurs aînés, à ces chants.

Les jeunes de la ville, quant à eux, ignorent tout de leur culture qui est aussi riche que celle des autres peuples. Ils ignorent aussi que les autres peuples ont lutté pour le prestige de leur culture.

Ces chants sont donc destinés à ces jeunes, afin qu'ils prennent conscience de leur valeur et profonde sagesse.

Pour qu'ils les protègent de la disparition qui les guette et qu'ils en soient fiers, surtout. Car celui qui dédaigne sa culture montre ipso-facto sa faiblesse d'esprit.

Nous avons ainsi voulu ouvrir la voie et préparer le terrain aux futurs travaux qui sont à entreprendre dans ce domaine.

@SOMALIBOOKS

Nous voudrions remercier pour finir tous ceux qui nous ont aidé dans ce travail et plus particulièrement ceux qui n'ont ménagé aucun effort pour nous apporter leur contribution dans la collecte de ces chants, surtout Mr OMAR GOOD BOUH pour l'aide qu'il nous a constamment apportée dans la collecte de nouveaux chants dans ce recueil.

Je tiens à exprimer mes plus vifs remerciements au professeur B.W. Andrezejewski, spécialiste des langues couchitiques et grand érudit de la littérature somali, qui a rédigé la préface de la première édition. Mes sincères remerciements, également au professeur CHARLE..L. GESHEKTER qui a bien voulu préfacer cet ouvrage.

Je n'oublierai pas l'aide inestimable du Ministère de la Jeunesse, des Sports et de la Culture, ainsi que l'agence de Coopération, Culturelle et Technique (A.C.C.T) qui a financé la Parution de la présente édition. J'exprime ma reconnaissance au ministère de l'Intérieur, ainsi qu'au secrétariat Général à l'information, je remercie en particulier la section Somalie de la Radio Télévision de Djibouti.

Enfin, mes remerciements vont aussi à ADEN Houssein Abdillahi , DAOUD A .ALWAN et Mohamed ELMI pour l'inéstimable contribution qu'ils ont bien voulu apporter à la revision de la traduction et aux relectures du présent recueil.



1. BAALUQA

BAALUQA HAFSADAY
MARKUU BIDHE DHAMO
BEEN U SHEEG SACA

Baaluqu, waa da' da labku ku noqdo gaashaan qaadka, dhidigoodkuna awr qaadka. Marka haddaba inanka baaluqa ihi u gorofka yar ku maalo caanaha ama u sacabsado, wuxuu is moodaa inuu yahay nin dhan oo wax qaban kara. Sida runtu tahayna ku ma filla awoodiisu fulinta hawlaha dhibaatada badan. Markuu ku dhaqaaqo dalag ka taagroon, dardarta hore biricbiricdiisu ma dhaafto, wuuna naasnaasiyaa, inyar dabadeedna wuu daalaadhacaa. Weyna adag tahay inuu hagartiro xoolaha u wado.

L'ADOLESCENT QUI BOIT LE LAIT DANS LA PAUME,
MENT A LA VACHE
DES QU'IL SE MET A BOIRE DANS LE «GOROF»1

L'adolescent a l'habitude de boire dans la paume. Qu'il boive dans le «Gorof», et il se prendra pour un homme.

En vérité, il est encore incapable de s'acquitter de nombreuses tâches. Son travail se limite a des fanfaronnades qui ne font que le fatiguer.

(1) GOROF : récipient servant à recueillir le lait.

@SOMALIBOOKS

2. BICIID

SADDEX LAGU BARAY
BAADIDOONYOO
BICIIDKUBA WAA
BUR DAREEMO AH
BOONJIDA CARRADA AH
LAASKA BADHAXA AH

Naflaydu iyada oo nolol wanaagsan wada jecel, ayey lo' duna kaba sii xagjirtaa. Waxay jeceshahay, ama had iyo jeer doontaa in ay barwaaqo hesho, oo ay biyo cabto maalin walba, carrana ay leefto.

Si kastaba ha noqotee, saddexda meel laga ma wada heli karo.Waxaa se dhici karta, in haddii la dadaalo la isku keeni karo intaba. Waana marka carrada loo soo guro ee la dejiyo meel biyo leh daaquna ka dhaw yahay, Ama daaq leh biyuhuna ay nan ka fogeyn.

. Wuxuu sheegay tix reebuhu in biciidka oo ugaadha ugu dadaal rooni uu isku waayey inuu meel ka wada helo saddexda heestu xustay; dulucduna waa dadaal la' aan wax la ma taransado.

ON T'A HABITUEE A CES TROIS
LA ET MEME LA BICHE EN CHERCHANT
N'A PU LES TROUVER
UNE TOUFFE DE HAUTES HERBES
UNE TERRE MEUBLE ET SALEE
UN SOURCE DELICIEUSE

Le chanteur énumère les trois éléments indispensables à la vache mais qu' on ne trouve jamais rassemblés au même endroit. Le travail de berger consiste à conduire le troupeau au meilleur pâturage sans trop s' éloigner des points d' eau et à leur apporter régulièrement à dos de chameau, souvent de très loin, de la terre salée.

3. GUBAN

BARWAAQADA GUBAN
WAA BIL KALIYEE
BEERKA HA U LULIN

Gubanku waa dhul kulul oo hooseeya, waxa u caado ah inuu tigaad hoosaad farabadan bixiyo inta roobku ku cusub yahay. Barwaaqadu se ku ma sii waarto, waxaana la moodaa in roob ku soo dhawaan. Waa sidaa darteed ta ku kallifitay inuu uga digo lo' da barwaaqada guban. Haddaba murtidan nuxurkeedu waa mid odhanaysa ; «Wakhtigu intuu nan ku dhaafin wax ka transo, hana isa siin samihiisa oo ah midaan lagu waarayn».

NE TE REJOUIS PAS
L'HERBE DE GUBAN
NE DURE QU'UN SEUL MOIS

Moralité : Il ne faut pas gaspiller ses richesses, car la saison sèche est inévitable.

Guban est une région côtière chaude où, dès qu' il pleut, poussent des herbes courtes mais abondantes qui sèchent et disparaissent rapidement.

@SOMALIBOOKS

4. CANTUUGO

CANTUUGA COLLOW
CAAGIMAYSIDE
CANKA HOOSIYO
CALOOSHA U TUDHO

Tiriyaha tixdu markuu arkay sac kamiin qaba, oo cosob iyo caws mid kasta ha noqotee laba canlaynaaya ayuu ka yaabay. Waxay la noqotay in laba canlayntaasi ay la iman dhibaato wax yeesha canka iyo caloosha neefkaa taqalufka ah, een baryo ku joogeyn qaddariixa degdega ah.

Tixduna waa tu sideedaba waano ah, oo ka soo horjeedda degdegsiimaha marka wax la cunaayo dadka iyo xoolaha qaar caadeystaan, waxay ina faraysaa in wixii dhuuniya ee la quudanaayo si fiican loo calaliyo si dhibaato u gaadhin caloosha.

PUISQUE AVEC TES GRANDES BOUCHEES
TU NE SERAS PAS RASSASIE
N'ABIME PAS TA PANSE
NI TES MACHOIRES

L'herbe est abondante et les vaches toujours trop gourmandes, ne s'arrêtent pas de brouter.

5. CAWO

CIRKU CAAD LEH
DHULKU CAWS LEH
CEELKU BIYO LEH
KAAGAN CIYAYEE
CALAACALAYAA
CALOOL NUGULAA
MUU CAWADII SUGO

Cirku daruuro iyo astaamo sheegaya inuu roob di'i ayuu lee yahay. Baad iyo biyana wali waa la haystaa. Wax dhibaataysan iyo wax tabaalaysan toona ma aragno, ee kan ciyayaa sal nugulaa, muxuu la calaacali, miyuu ka dhursugo nasiibkiis iyo saadaasha wanaagsan ee lagu niyad san yahay, samaduna ay farin. Ujeedadu waa sabir ha la ogaado.

IL Y A DES NUAGES DANS LE CIEL
DE L'HERBE SUR LA TERRE
DE L'EAU DANS LES PUITS
ET TOI TU BEUGLES
ET TU TE PLAINS
QUE TU ES IMPATIENTE
POURQUOI N'ATTENDS-TU PAS TA CHANCE ?

A la veille d'une saison des pluies, la vache manifeste son impatience de brouter l'herbe verte et tendre.

@SOMALIBOOKS

6. CULLAN

SACAAN CULLANKII
CEELKA UGU DHACAY
HA I CAMCAMIYEE
HA IGA CELININA.

Murtidu waxay sheegaysaa in tiriyuhu arkay tiiyo la dhibaayo sicii ama lo' duu watay oo laga hor joogo ceelka. Isaga oo muujinaaya inuu raali ka yahay, ayuu kuwii ku leeyahay dartiis ayaan ceelka ugu dhacay, ee siduu rabo ha ii galee iska dhaafa, oo faraha ka qaada. Ujeedaduna waa hawl iyo ninkeed allaa isbaday; ee ha la isku dhaafo, oo in la iskaga bi' in.

C'EST POUR CETTE VACHE
QUE JE SUIS DESCENDU DANS LE PUITS
LAISSEZ-LA ME BOUSCULER
NE LA REPOUSSEZ PAS.

Les vaches qui ont soif se jettent sur l'abreuvoir et sur celui qui leur donne à boire.

Des bergers interviennent à coups de bâton pour les faire reculer.

7. DAYR

DAYR DHALKAAGIYO
DAYR NIN GUURSADAY
DAGAAGILANYOO
DAANKU DHEERAA

Dayrtu waa xilli gu dhamaaday, jiilaalna afka soo kala hayo, lo' da neefka xilligaa dhala iyo ragga kii guursadaaba wey jilcaan, rafaadna wey mutaan.

Tixduna waxa ay ka digeysaa, in raggu guurka iska illaaliyo dayrta, si ay nan u diihaalin. Labaduba waxa ay ku farsan yihiin marka barwaaqo arlada maashayso.

QUAND TU METS BAS EN AUTOMNE
TU T'AFFAIBLIS
ET TU AS MAUVAISE MINE
COMME UN HOMME QUI SE MARIE EN AUTOMNE

La vache qui met bas ou l'homme qui se marie en cette saison ne peuvent pas récupérer leurs forces car la nourriture est rare.

NDT : Dayr; traduit ici par automne est une saison correspondant aux mois d'Août, Septembre et Octobre. C'est la fin de la saison des pluies et le début de la saison sèche dans les hauts plateaux.

@SOMALIBOOKS

8. DEEQ

DEEQ ALLAA LEH
BILLEE DIRIRKUBA
KUU DARUURYOO
KUU DARUUREE

Raxmad lagu hagar baxo eebaa leh, billee kuu da' dirirku oo kaaga roonaa gugii sida wanaagsan aan u di'in.

DIEU EST GENEREUX
IL SE PEUT QUE VENUS
T'APPORTE LES NUAGES
ET LA PLUIE

Cette chanson est une prière pour demander la pluie à une période où elle est habituellement rare. Elle laisse supposer que la saison des pluies a été mauvaise cette année là.

NDT : Les nomades donnent à la saison se situant de fin Octobre au début Novembre le nom de l'astre Vénus. Ils connaissent suffisamment la carte du ciel pour établir un calendrier des pluies régulières.

@SOMALIBOOKS

9. DIBI

WAXAAN DIRRO GALAY
EEN DARRAADII
DACADA HOOSIYO
DIIMISKA U TAGAY
MIYUU DIBI DHALAY
UU DURTABA GUDHAY

Wuxuu u daalaa dhacaayey, ee u dhibaato iyo dacas walba dartiis u mutaystay, ee u qudhunka iyo diimiska iskugu riday, waxay ahayd inuu sacu weyl dhalo, abaalgudkiina u weysha noqdo. Haddaba sobabtuu dhalashada dibiga uga xumaaday tiriyaha tixdu waxa weeye dibiga oo aan taran ku kordhin lo'da. Taasina waa aragti xoola dhaqatadu ay ka siman tahay, kana soo horjeedda neefka lab ee dhasha. Saca dibiga dhala, yaalaba waa laga qalaa, taasaana ugu wacnaata gudhmada degdega ah.



Haddaan, si kale u eegno, wixii lagu dadaalo awoodna la saaro, hadduu sida la filaayo wax uga qabsoomin, calaacal baa lagu gocosha-reemaa, oo la isku illowsiiyaa wixii laga filaayey ee laga waayey, tixduna waa tu calaacal ah.

MALGRE LES PEINES
QUE J'AI ENDUREES POUR ELLE
MALGRE MA DESCENTE
AU FOND DES PUITS
VOILA QU'ELLE MET BAS
UN TAURILLON
ET QUE DEJA SON LAIT A TARI

Le berger a supporté toutes les souffrances, il a plongé dans la boue pour prendre soin des vaches qui doivent mettre au monde des petites vaches et non des taurillons. Il aura du lait et des petites vaches.

@SOMALIBOOKS

10. DAWLIS

DOOG IYO ABAAR
DAYR IYO XAGAA
KAA MA DAALOO
HAAWSHA KA MA DEGO
DAWLIS BAAN AHAY
CEEL DUSHIIS IYO
DARKA KUU YAAL
OO MA DIIDANI

Wakhtiga kiisa san ee aaranka ah iyo kiisa oboska ah. Dayr iyo xagaa, kolba kii la joogo ani waa ii masso, oo adeggaa ka ma nasto. Waxaan ahay kii had iyo jeer hawlahaaga u heegana, ee darka iyo ceelka kuu dul yaal.

Ninka heestan tiriyey, xog warankiisa laba halba wuu uga jeedi kara. Waa mare, in tix tiriyuhu yahay xilkas dantii garada ah ama iney ciidan darro cabashada ka keentay.

ABONDANCE OU SECHERESSE
AUTOMNE COMME ETE
JE TRAVAILLE POUR TOI
ET SANS RECHIGNER
JE M'ATTELLE ET ME TUE A LA TACHE
TEL LE SEAU TOUJOURS PRET
AU DESSUS DU PUITS
A CÔTE DE L'ABREUVOIR

NDT : Le mot «doog» traduit par «abondance» signifie littéralement l'herbe verte.

- Pour «automne» voir note de la chanson 8.

11. DILLO

DUUDKA SARARTIYO
DILLOOY MURUQYADA
ANOON DIB U DHIGAN
KUU DINDIMIYEYE
MA DARKAA JABAN ?
MA ANAAN DARIN ?
MA ADIGAA DURAN ?

Tixtiriyuhu markuu darkii shubay, ee u waliba shubay ayuu dareemay daal. Kolkuu arkay lo'diiyoo sii gannoodana yaab ayuu eebe u keenay, wuxuuna garan waayey waxa dhacay ee ay lo'du la foorarto. Waa markaa markay talo ku ciirtay ee u weydiiyey su'aasha odhaneysa :

Dillooy waxaan isku la hadhay ma jirto, intii aan ciidmi lahaana qabtee, ma darkaa jaban oo biyaha celineyn, mise adaa taqaluf ah oo wax kugu filaan karaa jirin ?

DILLO JE N'EPARGNE
NI MON DOS NI MES COTES
NI MES MUSCLES
POUR TE DONNER A BOIRE
L'ABREUVOIR EST-IL CASSE ?
AI-JE FAILLI A MA TACHE ?
ES-TU TROP VORACE ?

- Dillo est le nom d'une vache.

-Le berger est à bout de force, mais les vaches ont encore soif.

@SOMALIBOOKS

12. DHABSI

DHABSIGII SHALAY,
DHEGTA KAA GALAY,
WAAN DHEX JOOGNAYE,
KA DHABAANDHABO.

Tix-tiriruyuhu wuxuu yidhi, isaga oo lo' da ujeeda dhibaatadii idin ka soo gaadhay harraadkii shalay, ee kulaylkiisu dhagaha idin ka soo baxay, ku illaawa biyaha oo ka wabxa, kana gilgisha dhiiladii idin soo martay, een goobjoogga ka ahayn. Waxa tixda ka muuqata in abaar naflaydu dhibsatay ay dhacday, oo ay ka danbeysey barwaaqo lagu reeyey.

LA CANICULE D'HIER,
QUI EST ENTREE EN TOI
PAR LES OREILLES
NOUS L'AVONS SENTIE
NE L'OUBLIE PAS

Le poète s'adresse aux bovins ; les difficultés qu'il a rencontrées, à savoir, la soif d'hier et la chaleur d'aujourd'hui, il ne doit pas les oublier, même s'il a bu maintenant, et qu'il ne vit plus dans la sécheresse.

13. DHEEHAN

DHIIGAYGA CABBOO
ISKA DHARAGOO
DHEEHAN GABAYGA IYO
DHAADASHADA DAA

Waxa la yidhaa; «Lo'du xoolo maahee waa xoog rag». Nin dhibaato badani ka soo gadhay hawshii u hayey, oo isloodin kari waayey, dantuna u diiday inuu nasto ayaa tixdan tiriyey.

Markuu gaawihii darka ku shubay, lo'diina ay wada fuushay, ayay ci tilmaamaysa waayaha san ee ay ku jirto isla daba gashay. Isna wuxuu dareemay isloodin la'aanta iyo xubnaha kala tegey iyo daalka shubaasha kala soo darsey. Cidii lo'duna waxay la noqotay tiiqtiiqsi, digasho iyo dhaadasho. Waa markaa kolkuu ku yidhi, gabaygaad tirinaysid ha ii celin.

BOIS MON SANG
BOIS A SATIETE
MAIS DHEEHAN ARRETE
TES BEUGLEMENTS MOQUEURS ET VANITEUX

Les beuglements de satisfaction poussés par les vaches qui ont bu sont interprétés, par le berger épuisé par ses efforts pour tirer l'eau du puits, comme autant de railleries.

NDT : Dheehan est un nom donné à la vache dont la robe comporte plusieurs couleurs.

14. ERGISO

ASHKIRO ERGOOY
ERGISAHA FARAS
EEN NIN LIHI WADAN
UL LOOGA MA TUDHO
WAANA LA ERYAA

Guud ahaan waxa ay murtiidu ina tusaysaa, in wixii mood iyo noola ee la amaaneysto ay baylahsan yihiin. Si aan sameyn intoo loogu dhaqmo, iyaa waxtarka ay leeyihiinna la moogaadaa.

Waxa laga yaabaa in ka tixda tiriyey ahaa ku lahaa sac markaa la ergisanaayey oo si dadaba ergistaha u faraayey inuu dhaqaaleeyo oo u hadiimo u yeelan. Waxa kale oo suurtowda in saca kiiyoo daranyo ka muuqato loogu keeney ceelka isaga oo ku hawlan waraabinta duunyaduu wattey. Deeto ay ka soo ifbaxday tixda u ku maansoodey ee sida loogu dhaqmo amaanada inoo sawiraysa.

OH ! ASHKIR LA PRETEE !
LE CHEVAL EMPRUNTE
SEPARE DE SON MAÎTRE
EST POUSSE TOUJOURS AU GALOP
SANS AMOUR NI MENAGEMENT

ASHKIR est le nom d'une vache prêtée qui comme tout animal loin de son maître est maltraité.

Ici un berger est réticent à prêter sa vache (ASHKIR) conscient du peu d'attention que les gens portent au bien d'autrui. D'où cette chanson qui fustige tous ceux qui abusent des biens empruntés.

@SOMALIBOOKS

15. GALSHO

GALBIN DHABAYOO,
GALSHA BUUXDIYO
GAL BIYO LEH HOROR.

Marka lo'du ooman tahay, jeeska ay samayso waxa laga gartaa in marraba ay nan gafayn meel biyo leh. Ninka heesta tiriyeyna markuu arkay lo'diiyoo kamiin iyo kidis kulá dhacday darkii, ayuu intuu aragtidaas ka maansooday, kaga warramay sida lo'da u caado ah. Kaan oqoon waa u cashar tixdu, oo fikrad bey ka siinaysaa lo' ooman sida yeelankeed yahay iyo sabir la'aanteeda.

DEGINGANDEE,
TU ASSAILLES LES POINTS D'EAU
ET LES PUITS PLEINS A RAS BORD.

C'est à leur comportement que l'on sait que les ovins ont soif. Le poète a récité ce poème lorsqu'il a vu les bêtes se jeter littéralement dans l'abreuvoir.

16. GURACAN

GEES GURACANLAW
SAAKA GEEDIGU
WAA GURACAN GUUR
OO LA GARAN WAA

Tixdu waxa ay sheegaysaa, in geediga loo raray, ama se lagu wado meel aan la sahamin oon ku habboonayn. Talada lagu rarayna ay u maroorto sida geeska saca lagu hal qabsaday.

Haddaba haddii talo kasta aan la falanqayn, oon la qaadaa dhigin si cilmiyeysanna la isku la meel dhigin, wey adag tahay sida ay u meel marto una noqoto tu tisqaadda oo loo aayo.

OH CORNE TORDUE !
LE VOYAGE CE MATIN
EST TORTUEUX
ET INCERTAIN

Le troupeau se déplace en quête d'un nouveau pâturage. Mais le berger n'est pas très sûr de son chemin qu'il compare à la corne tordue d'une vache. (Corne tordue est le nom de la vache).

Le nouveau pâturage n'a certainement pas été reconnu d'avance et une bonne concertation n'a pas précédé la décision du voyage.

@SOMALIBOOKS



@SOMALIBOOKS

17. GIIR

INTA GIIRBA
GEES MADAW YAHAY
GEELAW YEELKAA

Waxa ka muuqata dulucda murtidan, in ka tiriyey yahay lo' lay ka soo hor jeedda mudnaanta geela lagu sheego. Taasna waxa tusmo u ah ujeedadiisa odhaneysa, inta lo' du ay ifka ku nooshahay geelow iyadaa kaa mudan oon kalsooni ku qabaa, danna kaa ma lihiye yeelkaa.

TANT QUE GUIRRE
A LA CORNE NOIRE
TANT PIS POUR LES CHAMELLES.

NDT : Le chanteur, tant qu'il lui restera une seule vache préférera les yaches aux chameaux.

- Guirre est le nom d'une vache.

- La corne est noire (de couleur sombre) pendant qu'elle est vivante.

@SOMALIBOOKS

18. GAAWE

AYAA GOBOLKAA

GAWRACA OO GADA

AYAA GOBOLKAA

GEEDO KU XIDHXIDHA

AYAA GOBOLKAA

RAARI GEDEFLIYO

CEELAAN GAMASHIYIN

ISKU GARAB DHIGA

OO GU IYO DAYR

GAAWAHA U CUGA

Murtidani, lo' dii waxa ay u kala saartay saddex qaybood. Qayb gabno ah, oo camal xun, waana ta gawraca loo qoondeeyey iyo gadashada. In caato ah oo cad iyo muuqaal midna aan lahayn, kuna habboon in la qadiyo. Ta saddexaad waa ayro nasab ah, oo loola jeeday inay dhaqaale wanaagsan hesho, kuna noolaato meel tigaaddu iska dulbaxday biyaha ceelkuna iska dhimin, oo gu' iyo dayrna gorofka loo cugo. Taasi waxay ka marag kacaysaa u hanweynida wixii wanaagsan iyo ka wajidadabka kii liitaaya.

UNE DE TES PARTS MERITE

D'ETRE TUEE ET VENDUE

UNE DE TES PARTS MERITE

D'ETRE ATTACHEE AUX ARBRES

UNE DE TES PARTS MERITE

DES TOUFFES DE HAUTES HERBES

PRES D'UN PUITS ABONDANT

ET DES POTS QU'ON FUME

ETE COMME HIVER

Cette chanson est destinée à un troupeau de vaches partagé en trois :

- La première partie est constituée de vaches qui donnent peu de lait ou qui ont mauvais caractère.

- La deuxième comprend les vaches trop vieilles et trop faibles. Elles ne donnent plus de lait et leur viande n'est plus bonne. Celles-là devraient être affamées.

- La troisième enfin est celle ou l'on trouve les meilleures vaches laitières.

19. GIIRE

SADDEX GOBONIMO
OONAD GARANAYN
GIIRE MOOYEE
GEELU KU LA MA LEH
GADHOODH GOOGO'AN
OO LA GALAB LULO
SAANTA GOGOSHA AH
EE GURYAHA TAAL.
GEESKA FIDHINKA AH
EE GUJADA KULUL.

Waxa caado u ah in xifaalo ka dhexayso lo'layda iyo geel dhaqatada soomaaliyeed. Ninka tixdan tiriyey wuxuu ka mid ahaa inta ku dhaqanta lo'da, kuna dhaadata dhaqshadeed.

Tixduna waxay tilmaamaysaa, saddex arimood oo geelu la wadaagin lo'da, waana saanta gogosha laga dhigo, caano gadhoodha oo la galab lulo, subagna laga la baxo, geesaha fidhinka ah ee uu iskaga rabo wixii dagaal kala hor yimaad.

TU PRESENTES POUR GUIRRE
SANS LE SAVOIR
TROIS AVANTAGES SUR LA CHAMELLE
LE LAIT BIEN CAILLE
QUE L'ON BAT LE SOIR
LA PEAU QUI SERT DE COUCHE
DANS LES MAISONS
LA CORNE POINTUE
QUI FAIT MAL.

Cette chanson s'adresse à la vache.

@SOMALIBOOKS

20. GUDUUDANE

GUDUUDANIHII
GUGII LAGA LULAY
GADH MADOOBIYO
GAMBOOLAY BAA
ISKU GACASHADAY
ANNA GO'AYOO
GOOR XUN SOCOD IYO
GUURAHAY DILAY

Iyada oo hawsha reerku ka dhaxayso dadka guriga jooga qofba meel u kaga aadan yahayba, ayaa haddana dheefta guriga taal loo kala dhaw yahay. Haddaba, ninka tixdan tiriyey wuxuu ina tusay inuu ahaa nin yarid ah. Intaa wuxuu raacshay, in isnaantu ay habeenkii odayga hoos ahaan u gunayso, oo isagana ardaaga lagaga tego, goorxun socod iyo hawlina u dheeraato urquun xumada.

PENDANT QUE LES BARBUS
ET LEURS FEMMES
SE REGALENT DE BEURRE
QU'ELLES ONT PRODUIT AU PRINTEMPS
JE ME TUE
PAR TOUS LES TEMPS
DANS LES MARCHES NOCTURNES

Un jeune homme se sent privé, au profit des adultes, des réserves faites à la bonne saison alors qu'il continue à travailler durement pour la survie des bêtes en saison sèche.





@SOMALIBOOKS

21. HINDHAADHIR

HAAMAHAAGII
HABEEN IYO SUBAX
HINDHAADHIRI JIRAY
HADHUUDH LAGU SHUBAY

Marka arlada barwaaqo jirto, haamuhu caano ayey la ceegaagsamaan, wax kalena inta badan lagu ma shubto. Murtiduna waxa ay ina tusaysaa in tiriyaha tixdu heestan tiriyey mar ay abaari dhaharatay, oo halkii caanaha lagaga shubi jiray haamaha lagu dooriyey hadhuudh. Sidaana waxa ugu wacnaa caano la' aan.

LES JARRES
QUE TON LAIT
FAISAIT RESONNER MATIN ET SOIR
LES VOILA PLEINES DE DOURAH

Pendant les bonnes années, lorsque les pluies ont fait pousser l'herbe, les nomades se nourrissent exclusivement de leur aliment préféré, le lait. Les animaux en produisent abondamment matin et soir.

Le chanteur qui vit une période de sécheresse regrette de devoir se contenter de céréales.

NDT : Il s'agit ici de récipients, fabriqués à l'aide de fibres végétales tressées, qui recueillent l'eau, le lait et le beurre. Leurs parois intérieures sont imperméabilisées par une mince couche de goudron en fumée obtenue à partir de plantes spéciales.

22. HABAW

YAAD HABAABINE
HEESTA WIILKIYO
HAWGA SOO RAAC
OO HA KALA HADHIN

Waxa loo jeedaa lo' soo aroortay oo wali iman ceelka. Waana waano odhanaysa, lo' yahay si aydaan uga habaabin meesha ceelku yahay, tixgali oo soo raac heesta wiilka iyo hawga baxaaya hana kala hadhin.

Si kale haddii loo eegona, ninkastaa hawsha u hayo sida habboon ee u ku fulin karaa waxay tahay, inuu ku dadaalo tixgalinta tabihii hortii jiray, kuna saabsanaa hawsha u hayo oo kale.

La ma huraanna waxa ah, inuu raaco xeeldheerayaasha taladooda. Arrima haas oo isbiirsaday ayaa hubaal ah inay u horseedi guul, oo u ku gaadhi danaha u leeyahay, himiladiisana cilmi ku dhis.

POUR NE PAS VOUS PERDRE
SUIVEZ LA CHANSON DU BERGER
ET LA RUMEUR VENANT DU PUITS
SANS VOUS DISPERSER

La chanson est destinée à des vaches sur le chemin menant au puits. On peut tirer de cette chanson la pensée suivante : pour réussir une entreprise, il faut rester unis et tenir compte de l'expérience et des conseils du sage.

@SOMALIBOOKS

23. HAGOOG

GEED HAGOOGANI
WAA HADH DABACSAN
NAAG HAGOOGANI
WAA HANGALA SIDA
GIIR HAGOOGANI
WAA HALTAGE QABE
WIIL HAGOOGANI
WAA HAD UUN DILE

Geedka si wanaagsan u baxa, ee laamihiisu is wada haystaan, ama se cufan yihiin, aad buu u hadh macaan yahay. Reer baadiyahana dumarkoodu ma hagoogan jirin, ta hagoogatana waxa loo yiqiin tu weeran. Naagta soomaliyeed ee hangasha sida, ama weeran, waxa caado ahaan loo yaqaan in seygeedii geeriyooday, ama ha la dilo, ama bes ha u dhintee. Waxa se jirtey, tu kale oo iyada oon laga geeriyoon ay caado u ahayd hagoog, ama hillaab joogto ah, taasna waxa loo arki jirey belo sheeg, ama belo sahadiya. Iminka se hagoogtaas oo kale la ma shu'aysto, oo loo ma arko ba' iyo hoog tu farinaysa.

UN ARBRE COUVERT
DONNE DE L'OMBRE
UNE FEMME COUVERTE
EST EN DEUIL
UN BOEUF COUVERT
EST SANS DEFENSE
UN JEUNE HOMME COUVERT
VA SE VENGER

Les femmes nomades se voilent que pour le deuil de leurs maris tués au combat ou décédés de mort naturelle. Le voile de la femme en dehors de cette occasion est considéré comme un présage de malheur.

Pour les hommes, le voile possède une autre signification, un homme peut se voiler si un de ses parents proches a été tué. Sa tête restera alors couverte tant qu'il n'aura pas accompli sa vengeance.

Un boeuf couvert est celui qui a les cornes recourbées vers le bas et qui se trouve donc désarmé.

@SOMALIBOOKS

24. HAYLKAYAW

WIIL HAL MAALAA,
WUU HURDAA WALI
ANNA HAYLKAYAW
WAA ANIGAA HILLAN
EE HUBKII SIDA

Waxa la yidhaa geela iyo lo' du wey kala hawl badan yihiin, oo lo' daa ka jira dishoota, taana waxa ka marag-kacaysa tixdan, oo qeexaysa, in lo' jirku goortii la arkaba ku hillan yahay qalab hawleedka, geel jirkuna ayaan u leeyahay faalalsanaanta. Laga yaabee in ka reebay murtida u sedku ku ahaa iniq, ama hawsha cid ka nasisa u waayey.

LE JEUNE QUI A BU LE LAIT DU DROMADAIRE
EST EN TRAIN DE DORMIR
ET MOI, Ô MA VACHE BIEN AIMEE
ME VOICI TOUJOURS ARME
ET PRET A ATTAQUER.

Garder les dromadaires est moins fatiguant que garder les bovins.



@SOMALIBOOKS

25. HORDHAC

HOOGA MAALYAW
YAA HORDHACA BARAY
UU ISKU HALLAYN

Tixdani waa tu wax ka sheegaysa sac ku karti darraa u lahaa, oo ugu danbayn jiray, lo'da dabadeedna fuli jiray. Maalin maalmaha ka mid ah ayuu kuwii kale uga soo hooreeyey darka. Ka tixda tiriyey oo oqoon u lahaa karti laawaha ayaa goob joog ahaa. Allaa yaab u keenay kolkuu arkay kiiyoo isa soo maqiiqaaya. Waana kolkaa kolkuu u jeediyey su'aasha odhanaysa, kaagan ka liitaa maalaa ma wax baa isbedalay, waa adigan darka isku soo tuurayee, mise cid aan kii ahayn baa kuu joogta meesha ood isku halayn.

TOI QUI APPARTIENS A UN FAINEANT !
SUR QUI COMPTES - TU
POUR BOIRE LA PREMIERE ?

Il s'agit d'une vache appartenant à un fainéant et qui avait l'habitude de boire les restes des autres troupeaux, son maître n'étant pas là pour lui tirer l'eau du puits. Un jour que la soif lui a fait oublier d'attendre, le chanteur le lui rappelle brutalement.

@SOMALIBOOKS

26. HABANAAN

HOOTADAADIYO
NAAG HUNGURI XUMI
ISKU MA HABANA
ISMANA HURAAN

HADHAAGAAGIYO
HAL DHURWAA IHI
ISKU MA HABANA
ISMANA HURAAN

HORMADAADIYO
WILL HULEEDHAA
ISKU MA HABANA
ISMANA HURAAN

Naagta hunguriga xun ee saluuga badan, kuna darsatay yaayuul iyo neefka gabnada ihi waxba isku ma aha, allaana isbaday oo meel ay kala tegi ma jirto, hadda oo midkood dahda mooye.

Neefka hadhaaga ah iyo dhurwaaguna inay kulmaan ma habboona, waxaana suuragala inuu mar uun waayuhu kulmiyo, haaddana loo wadho neefkaas.

Wiil aan feejigneyn, hawlkarra ahayn iyo xoolaha guulle badayna isku ma wanaagsana, cid kalena loo ma hayo oo wey is huran yihiin.

LORSQUE TU DONNES PEU DE LAIT
TU NE PEUX PAS ALLER
AVEC UNE FEMME EXIGEANTE
C'EST POURTANT INEVITABLE
LORSQUE TU TRAINES A LA MARCHE
TU NE PEUX PAS ALLER
AVEC UNE HYENE
C'EST POURTANT INEVITABLE
ET EN TANT QUE TROUPEAU
TU NE PEUX PAS ALLER
AVEC UN BERGER FATIGUE
C'EST POURTANT INEVITABLE

27. HORID

ADOO HOOTO AH
OO HADHAALE AH
OO HIRDINA BADAN
LO'DA KA HORTEED
HA LA ISOO HORO
SIDEED KU HESHAA

Tixdu waxay caddayneysaa, in wixii faa'iida li'iba culays ku hayo ciddii ka mas'uula, xasarad hadduu ku darsadana loo ma tawaabo, waana la hatigaa. Waxaa la maso ah neefkaas, qof karti laawe ah, oo dabeecad xun, laguna sheegi karo xadhig la ma sitaan, oo raba inuu ka mudnaado asaagiis, qayb libaaxna u helo.

TU DONNES PEU DE LAIT
TU TRAINES PENDANT LA MARCHE
COMMENT VEUT-TU
QU'ON TE DONNE A BOIRE
AVANT LES AUTRES ?

Les incapables veulent toujours être mieux servis que les autres. Pour cette raison, ils sont souvent insupportables.



@SOMALIBOOKS

28. HAWIRAN

MEEL AAN LOO HUBIN
OON HORSEED TAGIN
LOO MA HAADSHOO
WEY HAWIRANTAA

haddii marka hore horseed jirin soo indhaindheeya halka daaq iyo biyo leh, ma habboona in lo' da loo raro, laguna hungoobo. Haddii se taasi dhacdo waa lagu niyad jabaa, waana tacab khasaare.

Dulucda tixduna waxa ay tahay, tusaalo ina tusaysa inay habboon tahay talaabadii la rabo in la qaado in laga fiirsado, oo wixii talo iyo tab ah ee ku saabsan wax qabasho, laga baaraandego, waxtarkeedna la ogaado, oon la dhaafin sida dantu ku jirto.

NE LES EMMENEZ PAS
VERS UN LIEU PEU SÛR
QU'UN GUIDE N'A PAS VU
ILS SERONT DEÇUS

Lorsque les pâturages des environs du campement ont été épuisés, ce dernier déménage pour s'installer plus loin. Mais les nomades ne se déplacent jamais sans savoir exactement où ils vont.

Après avoir pris des renseignement précis d'autres voyageurs, c'est souvent un ou deux hommes du campement qui partent repérer l'endroit et vérifier ces points d'eau et ces pâturages.

29. ILWAAD

ILWAAD ARARTII
IN LA NACAY MOOD
OO ILMADA SEYDH
WAA SE LA OG YAHAY

Waxa dhacday in saca laba maalmood aan la waraabin, maalin saddexaaddiina u ku raagay ararta, wuxuuna u qaatay inuu ka qatanaan doono maalintaana biyaha. Deedna ci laga dhadhansaday calaacal ayuu ciyey, oo lagu tilmaami karo tu cabasho. Waa markaa kolkuu ku yidhi, ku afgartee ha biqin oo ha calaacalin maantana oon ku joogimayside.

ILWAAD BEUGLE TRISTEMENT
ELLE SE CROIT DELAISSEE
ELLE VERSE DES LARMES
MAIS ON PENSE A ELLE

Ilwaad, est une vache qui "n'a pas bu deux jours successifs. Au troisième jour, elle est impatiente d'aller au puits, mais le berger laisse traîner le troupeau au pâturage.

@SOMALIBOOKS

30 KABASHO

KABASHO U DHIMAN
AAYAR KA MA TAGE
KAYD U HAYSTANA
KAL GEEL KU MA QADE

Waxa muuqata in ninka tixdan tiriyey lo'dhaqato ahaa, hase yeeshee uu hore ugu soo dhaqmay geel, haddii uu nan ku soo dhaqminna aqoon u lahaa kal waraabka lo'da iyo geela.

Haddaba, siduu u shubaayey darka ayuu dareemay daal, wuxuuna arkay sii gannoodkii lo'da. Waa kolkaa, markuu ku dhaga hadlay, ee u ku yidhi ; kabasho kuu dhiman kaga tagimeysid biyaha, inta geel ku qadana wallee ku ma qadid.

S'IL TE MANQUE UNE GORGEE
TU N'ABANDONNES PAS LE PUITS
ET TU NE VIS PAS SUR TA RESERVE
AUSSI LONGTEMPS QUE LE CHAMEAU

Cette chanson destinée à une vache montre sa faible résistance à la soif.

31. KAYD LULA

NAAGTA KAYD LULA
EE RAGGA U KULUL.
KALDAMBEED IYO
KALIIL HA U DHALIN

Ninka reer miyiga ihi marka u socdaalaayo, wuxuu ooridiisa iyo inta ay iskaashadaan u sheegi jiray inta bari ee u maqnaandoono, reerkana wuxuu ku sii balamin jiray kuwa u bidaayo xilkasnimada.

Marka soo noqodkiisu soo dhawaado ayey haweenaydu kayd sii dhigi jirtay. Yaalaaba kaydku wuxuu noqon jiray caano, gaar ahaan kuwa lo'da. Iyagana afar iyo labaatan saacadood kaydkoodu ma dhafo. Mar haddii ay gadhodhanna weelka waa laga madhiyaa, oo kuwa lis ah ayaa halkooda lagu shubaa.

Naagta wax garadka ihi kuwii gadhoodhay waxay siin jirtay ama se ay siisaa ninkii lagaga tegey. Ta lexejeclada badani se wey lulataa, waxaana lagu sheegi karaa qof u quudhi waayey ama se qaduucnimo ka indhosaabtay kay dumaddiisa saaraayeen.

Haddaba ninka sacan la hadlaayey wuxuu u jeeday, in sacu u dhalin naagtii kii lagaga tegey u quudhi weydey kaydkii. Wuxuu si gaar ah saca ugu goobaabiyey in guga dabayaaqadiisa u dhalo, oo uu nan bilawgiisa iyo kaliisha toona u dhalin. Si neefka u sacu ku lamaan yahay u helin daaq u kaga kaaftoomo naaska hooyadiis, uguna baahdo caanaheeda.

Haddii sidaasi dhacdo waxay kayd lula arintaasi u horseedi caano yari, una suurtoobi meyso iney subag badan dhigato. Waxa dhici jirtay, in reer baadiyuhu kolkuu gu'gu u dhamaado ay isweydiin jireen inta sac ee u irmaan hebel iyo intay subag dhigtay marwadiisu.

Naagba naagta ay ka subag dhig badnayd, ayey ka sharaf badnayd. Tii subag dhig yarina weyba ugu liidatay. Waxaan odhan karraa sobabtuu sidaa u yidhi tix tiriyuhu, waxay ahayd sharaf uu u diidaayey kayd lula. Wuxuuna noqon kara inuu ahaa kii lagaga tegey reerka ee ay qabsatay arintu.

@SOMALIBOOKS

POUR LA FEMME QUI BAT LE LAIT RESERVE
A SON MARI ABSENT
ET QUI EST SEVERE POUR LES HOMMES
NE METS PAS BAS
A LA BONNE SAISON

Avant de partir en voyage, le nomade dit à sa femme et aux hommes qui restent au campement, la durée probable de son absence.

Lorsque son retour approche, sa femme lui réserve chaque matin une part de lait ; celui de la vache dont le lait a caillé rapidement et ne peut attendre plus d'une journée.

Dans la chanson, la femme au lieu de donner le lait caillé aux hommes restés au campement et chargés de la protéger, le bat pour en faire du beurre.

Le chanteur est un homme qui se sentant frustré de ce lait , s'adresse au troupeau de la femme.

NDT : (NOTE DU TRADUCTEUR)

Kaldambeed et kalil traduits ici par « bonnes saison» sont des courtes périodes chaudes qui annoncent et précédent les pluies de Mars.

Lorsque les vaches mettent bas à cette saison, elle sont assurées de trouver de l'herbe et de l'eau pour leurs petits.

Ces derniers seront assez grands pour affronter et survivre à la saison sèche de l'été.

@SOMALIBOOKS

32. LAAS

LAAFYAHAYGIYO
LAASKA GAABANI
WEY KU LIMIYEEN

Tixdani waxay sheegaysaa in meesha laga waraabinaayey lo' du ahayd meel si fudud ay uga fusho. Ka darka shubayeyna ay nan dhibaato ku hayn oo u si xarago ku jirto uga bixi jiray hawsha. Taana waxa ugu wacnaa laaska gaaban ee biyaha badan iyo ninka oo hawl kar ahaa.

Wuxuu se dareemay tiriyaha tixdu, in xooluhu ku walfeen sida fudud ee ay ku haqabbeelayeen. Waxay la noqotay haddii ay la kulmaan meel biyo yar, darkana laga shubo ceelal dhawr shub ah, inay kollaba sabir yeelan doonin.

Si kale haddii loo eego, waa murti tusmo u ah, in lagu meel mari karin kaalmo si fudud loo helo. Taas oo lagu simaadi karo ayaamo tirsan oo la mid ah bil saddex ah, oo iftiin keedu intuu gurigaaga kaa kexeeyo aan ku kalena ku gaadhsiineyn.

MON AISANCE ET MA FACILITE
DANS LES PUITS PEU PROFONDS
T'ONT GATÉ ENORMEMENT

L'eau abondante et le prés du pâturage n'exigent aucun effort.

Le troupeau va au puits sans forcer la marche et le berger tire l'eau sans difficultés.

La chanson met en garde contre ces facilités qui ne dureront pas.

33. MARSO

MARSOOY MARINKII
MAS WAX LAAYIYO
MAROODAA DEGEY
OO LA MARI WAA
WAA SE LAGU MARIN

«Marsooy» marinkii ceelka loo mari lahaa waxa degey mas wax laaya iyo maroodi kaba sii daran. Hase yeeshee dib looga noqon maayo halkii dantaadu ay ku jirto, oo waan u huri naftayda, waxaana ku dadaali sidii aan u mari lahayn, biyona ad u heli lahayd. Waxa u tix-tiriyuhu maska iyo maroodiga u ku sheegay, waxay u dhaw yihiin inay ahaayeen col ama budhcad qawlaysato ah.

O MARSO LE CHEMIN EST OCCUPE
PAR DES SERPENTS MECHANTS
ET PAR DES ELEPHANTS
IL PARAIT INACCESSIBLE
MAIS NOUS PASSERONS QUAND MÊME.

- «Marso» est le nom d'une vache.

- Le berger est prêt à affronter tous les dangers qui barrent la route vers les nouveaux pâturages ou vers les puits.



@SOMALIBOOKS

34. MURUGO

CIRKU MAYAY BUU
LA MADAW YAHAY
MAGAAL MIDAB BUU
LA MADAW YAHAY
MASKU MALAG BUU
LA MADAW YAHAY
CEELKU MAAX BUU
LA MADAW YAHAY
ANNA MURUGIYO
MAXAY MUDAN BAAN
LA MADOOBAHAY

Cirku wuxuu madoobaadaa marka dhamaantiis daruuro biyo xambaarsani ay shareeraan. Magaal oo ah saca lagu halqabsadayna midabkiisaa madoobaa. Maska dilaaga ihina marka u dhiidhiyo waabaydu cudhkay iskugu ururtaa, oo iyadaa ka midabkiisu madaw yahayna sii madoobaysa, ka kalena ka yeesha madow. Ceelka gunta dheerina markuu si wanaagsan u maaxsamo madaw mooyee waxa guntiisa ku jira la ma arko. Tix tiriyuhuna uma dhalan madawgee, waa astaan murugo oo kala soo daristay fikirka iyo siduu u daryeeli lahaa ugana badbaadin lahaa lo'da, abaarta faraha baas ku haysa.

LE CIEL EST NOIR
D'AVERSES
MAGAAL EST NOIRE
C'EST SA COULEUR
LE SERPENT EST NOIR DE VENIN
LE PUITS EST NOIR
DE SON EAU
LA MER EST NOIRE
DE RICHESSE
ET MOI JE SUIS NOIR
DE TRISTESSE
ET D'INQUIETUDE SUR L'AVENIR

MAGAAL est le nom d'une vache.



@SOMALIBOOKS

35. MAYDHAQ

MAYDHAQAAGII
MIIGSANAAN JIRAY
SAWKA MUUDSAMAY

Iyada oo waxyaabo fara badani keeni karaan isbedelka ku dhaca oogada naflayda, ayaa loo malayn karaa in markii tixdan la tiriyey abaar arlada kibtay ay dhacday. Waxa u daliila, ku halqabsiga neef bari samaadkii oogadiisu giigsanyd, oo ay sigibtirayd, quruxina ka muuqatay, oo deeto lafta iyo saantu isku dhegeen.

TES FLANCS
BIEN TENDUS
LES VOILA FONDUS

Le chanteur déplore les effets de la sécheresse sur ses animaux qui ont maigri et n'ont plus que la peau et les os.

36. MAAX

JEERUU MIISAAN
MAAXDA HORE DHAMO
MIYIR MA LIHIYE
MUSLIN ALLAW
YAAN LA MOOGAAN

In kasta oo tiriyaha tixdu ku halqabsaday sac, haddana murtidu waxay saamaysaa dhammaan lo' da oo idil. Ujeeddaduna waxay muujinaysaa in intay oomaan tahay isna uu miyir laayahay, wuxu falayana uu nan garanayn. Waana afeef dhigasho ujeedadeed tahay, in hadduu gafo loo dulqaato.

TANT QUE MIISAN
N'A PAS BU L'EAU CLAIRE
JE N'AI PAS TOUS MES ESPRITS
Ô MES FRERES, CROYANTS
NE L'OUBLIEZ PAS.

MIISAN est le nom d'un vache.

Les bergers se disputent la première place au puits pour servir à leurs bêtes, les eaux claires qui se sont décantées la nuit. Les puits sont rarement abondants, le niveau de l' eau baisse et elle devient de plus en plus boueuse.

@SOMALIBOOKS

37. MATAANO

MIDMIDEEYOO
MAR GEELLEEYOO
MAANTA DABADEED
MATAANO HA DHALIN

Sac waligiiba mataanayn jiray ayaa tixdan loola jeeday. Waana waano odhanaysa sac yahaw ha isku dhalin mataano danbe. Taana waxa la timid taag daro laga dareemay, ka lihina wuxuu ka baqay inuu sacu dhinto, hadduu mataaneeyo mar kale.

COMME LES CHAMELLES
FAIS DES PORTEES UNIQUES
ET A PARTIR D'AUJOURD'HUI
NE DONNE PLUS DE JUMEAUX

Il s'agit d'une vache usée par plusieurs portées doubles et à qui son propriétaire, pour ne pas la perdre, souhaite des portées uniques.

38. MIRASHO

MIDADAWSIGU
WAA MIRTTII XALAY
EE MACAANYD

Lo'du waxay habeenkii mirta macaansotoba, kolka la aroorsho, ee darka loo hilliyo, biyaha ka ma bogato, degdeg beyna uga baxdaa darka, inyar dabadeedna wey ku soo laabataa, oo oonkii hayey bay dib u dareentaa, waana u caado inay sidaa yeesho kolkay mirta ku raagto. Ka oqoon u lihi wuu ku soo talogalaa midadawsigeed oo ma dhibsado. Geeluna ma mirtee, wuu caweysimaa.

SI TU BOIS PAR INTERMITTENCE
C'EST QUE TU AS BROUTE HIER SOIR
AVEC DELICES.

Lorsque les bovins broutent l'herbe à la tombée de la nuit, ils ont la manie de boire avec beaucoup d'interruptions. Ils s'abreuvent, quittent le puits, reviennent de nouveau. Le bouvier avisé et consciencieux s'arme de patience devant ce va et vient, à la longue irritant.

@SOMALIBOOKS

39. NAANI

NAAGI MAASHAYAW
WAA NAFTAADEE
NAANIDA HA JABIN
OO NINKA HA DILIN

Baryihii hore dumarku ma maali jirin lo' da. Haddii la helana dhif bay ahaayeen, waxaana looga biqi jiray in lo' du dhibaato u geysato dumarka. Waa ka hayinka ah ee iyaga ogol ka lala hadlayaa oo isa soo maqiiqay. wuxuu jiidhi gaadhay darkii iyo kii shubaasha gacanta ku hayey. waa kaa iyo kii la masso ah, ee halis galiya wixii u dan ah kuwa ujeedadu u dhacaysaa.

TOI QUI TE LAISSES TRAIRE PAR UNE FEMME
PENSE A TA SURVIE
NE CASSE PAS L'ABREUVOIR
NE BLESSE PAS L'HOMME

La traite des vaches, sauf si elles sont particulièrement dociles, est en général réservée aux hommes.

Cette chanson rappelle à une vache docile qui s' impatiente au puits que c' est le travail de l' homme qui la fait vivre en lui tirant l' eau du puits et en la menant aux meilleurs pâturages.

@SOMALIBOOKS

40. OOGO

WAAN OGAAYOO
OOGADII BAY
ILWAREN IYO
OOHIN KALA TIMID

Oogadu waa dhulka sare ee dhaxanta iyo dabaysha badan. Lo' duna uma adkaysato oo indhaha ayey ka riddaa. Wuxuu tiriyaha tixdani sheegayaa, inuu iska garanaayey inay indha hadoodka kala timid oogaday ku maqnayd.

JE LE SAVAIS
TU RAMENES D'OGO
LE MAL DES YEUX
ET LES LARMES

OGO est une région de hauts plateaux où soufflent des vents forts et froids, très mal supportés par les vaches.

41. QOSOL

QOOR YAR EDAGGII
QALFOONKA LAHAA
QOORTA MA U RIDAY
ANNA QOYS KALE
QISHINO DUMAR IYO
QOSOL MA U TAGEY.

Heestani waxay ina tusaysaa in tiriyuhu soofiyay, fiidkiina sifiican u daajiyay lo'dii. Intii irmaanayd markay guryo timid, ayey hanaqa kala dheceen edagtii weylaha, si ay uga war helaan dhashoodii, isagiina wuxuu u haasaawe tegay qoys oosha ka mid ah. Wuxuu ku seegay dantiisii, qosolkii dabacsanaayee is moogaanta isku dhafsanayeen isaga iyo gabadhuu gayaansanaayey. Waxaa dhici karta inay weylihii jaqeen sicihii, oo u caano la'aan u mutaystay tix tiriyuhu. Deeto sobabtaasi ka keentay tixdan u kaga xog waramaayo falkiis iyo falka lo'daba.

VOILA QUE LA VACHE
AU PETIT COU S'EST INTRODUITE
DANS L'ENCEINTE (DES VEAUX)
PENDANT QUE J'ETAIS EN QUÊTE
DES FEMMES ET DES FACETIES.

Après avoir fait paître les bovins, il revient au campement et se met à faire la cour à sa bien aimée, c'est l'occasion pour les vaches de rejoindre leurs petits et de se laisser téter.

42. RAARI

SIDII RADIN MALAB
AMA REER DEGGEY
RAARI MEELLABA
WUU RUDHAAYOO
WUU KU RARAN YAHAY

Aad bay shinidu ugu ururtaa radinta malabka, waxyna ka hirtaa oo ay ka hor joogsataa wixii damca inuu gurto dareensiiyo. Waxa kale oo jirta kolka reer meel dego in cida xoolaha, sanqadha iyo baaqu hugun abuuraan. Indhuhuna waxay ku dhacaan dad qofba meel ku saloogan yahay, miyirkooduna ku eedan yahay dejinta reerka. Intaba wuxuu ku simaaday tix tiriyuhu, lo'da oo kolka ay baahan tahay cidi ka hor joogsan karin meeshii baad leh.

VOUS VOUS RUEZ
TEL DES HOMMES AU COMBAT
SUR L'HERBE TENDRE
COMME SUR UNE RUCHE DE MIEL.

@SOMALIBOOKS

43. REEBI

REEBI LAYSAYAW,
REER ADHIILE AH,
RAARIDII DEGAY,
OO INAGA RARAY.

Adhiga iyo lo'du sida meel ay u wada degaani wey adag tahay, sobabtuna waxay tahay, in meesha adhi maray ay la mid tahay meel ayyax carrabka mariyey. Sidaa darteed ayuu tiriyuhu ugu sheegay in qolkii ay ku ladnayd reer adhiile ihi la soo darsay, oo ay nan ku habboonayn in la sii ag joogo, in laga guuraana ay qumman tahay.

QU'ELLE SOIT MASSACREE, CETTE FAMILLE
QUI S'EST INSTALLEE AVEC SES CHEVRES
DANS CE PATURAGE
ET NOUS EN A CHASSES.

En général, chèvres et ovins cohabitent difficilement la raison en est que les chèvres sont aussi dévastatrices que les criquets.

La famille en question étant arrivée avec des chèvres, il est préférable de s'en éloigner.

44. RAMASH

HADDUU ROOB DA'O
OO RAMASH BAXO
HAAN RUGLAYSIYO
RAAXO WAA ADI
RUUXU WAA GEEL
REERA WAA ADHI

Heestan waxa tiriyey nin ku dhaqmay lo'da. Oo ka xogwaramaaya badhaadhaha ay leedahay barisamaadkii, wuxuu se liiday geela oo u ku tilmaamay dhaqashadiisu tu ah dhaadasho. Adhigana tix tiriyuhu wuxuu siiyey aqoonsi iyo inuu yahay laga ma maarmaan.

LORSQUE LA PLUIE ARRIVE
ET QUE L'HERBE POUSSE
LES OUTRES QUI BATTENT LA MESURE
ET LE BONHEUR : C'EST TOI
LES CHAMELLES N'ONT QUE LE PRESTIGE
ET LES BREBIS LA SECURITE.

Le chanteur qui possède des vaches, fait ici leur éloge en période de pluie.

NDT : Outres : voir note de la chanson 15.

Le mot «ADHI» traduit ici simplement par brebis est un nom collectif désignant à la fois les moutons et les chèvres.

@SOMALIBOOKS

45. MADAL

MAANTA SILICDAYE
BARI SAMIROO
SANDANBIYO MADAL
SOO SALAAN CELI

Wakhtigu ninna uma sama. Mar waa adi, marra waa qayrkaa. Haddaba, neefka lagu halqabsaday iyo intay hayb wadaagaan ayaa lagu leeyahay, maanta silic iyo saxariir ku cabtee bari intaa ku sabra balanteenna waa sahandanbe oo idiin ka samaan maanta.

Waxa laga yaabaa, in maalintaa iyada ah, ee xoolaha ninku silica ku cabbeen, u dhacay wax la ma filaan ihi. Sida ceelka oo biyihiisu yaraadeen, ciidan daro ama se cududba loo sheegtay.

INSATISFAITS AUJOURD'HUI
PATIENTEZ-VOUS ENCORE DEMAIN
ET RENDEZ-VOUS AU PUITS
APRES-DEMAIN

Le berger a été incapable de donner assez d'eau à son troupeau: le puits n'avait pas beaucoup d'eau ou était trop profond ou bien il a été chassé par d'autres bergers plus forts que lui.

Il promet que la prochaine fois il prendra toutes les dispositions pour faire boire ses animaux.

46. SUUB

SUUB HUNGURIGAA,
SAYMO ADAG IYO,
SUUN WALBA I MARI,
WAANA SOBABTAY.

Ka lo'da leh ama ka jiraa daraadeed ayuu meel kasta oo si walba leh u maraa. Silic iyo saxariir wuxuu ka mutaystona iyadaa u sobaba. Hadduu sidaa yeelinna wuu ogsoon yahay inuu waxba ka dheefayn, intaa wuxuu ku daray oo u raacshey, inuu sobab kale oon teeda ahayn ku geeriyooneyn.

O SUUB, J'AI PRIS
POUR TE NOURRIR
DES VOIES ETROITES
PLEINES DE MONTS, DE PRECIPICES
ET DE TOURNANTS.

Le bouvier est obligé de passer partout pour ses vaches. Il est prêt à endurer toutes les souffrances. Sinon il n'en tirera aucun profit.

@SOMALIBOOKS

47. TARAN

AD KU TARANTIDE
TUURTA HARAWIYO
TODOB DHALISTIYO
TAADHIDA HA DAYN

Si taran kaagu u bato saddex midna ha dayn sacyahaw ama lo' yahay ku noolaashaha tuurta harawo, oo ah barwaaqo iyo gu walba bilawgiisa oo ad dhashid. Halkaa waxa ka muuqata in harawo tahay meel ku san oo lagu dhaqi karo lo' da.

POUR PROSPERER
NE QUITTE PAS LA MONTAGNE HARAWA
NE CESSE PAS DE METTRE BAS
A CHAQUE PRINTEMPS
ET DE FAIRE DES JUMEAUX

NDT : Le mot TODOB traduit ici, par printemps, n' est qu' une courte période d' une quinzaine de jours correspondant à la deuxième moitié de mois de Mars.

48. JIILAAL

WAAGA JIILAAL
WIRIDAHA DHIGO
WEYNOW GEEL IYO
WANKII MA IHIDE
WIXII BAAD TAHAY
HAADKU WEYWEYEY
HAWEENKUNA WARAY

Geela iyo wanka weynee amihinka ah abaartu hore uma legeddo iyaa la yidhaa, wacdiga iyagaa lagaga baxaa. Wanka waa la gattaa, geeluna rarasho iyo maalisba waa u maqaaman. Lo' du se intay dhimashadeedu badato, ayey haadka iyo waraabuhu ku hagarbaxaan, inta liciiftana dumarkaa duleedka ku urquumiya. waxa tixda ka muuqata in la joogay goor barwaaqo ah, oy caano iyo qurux isku darsatay lo' du, isla markaana wuxuu u murti reebuhu humaagsaday abaar waxyeeladeed, wuuna ka beer xanuunsaday, siday lo' du ugu laafto abaaroodka.

LORSQUE L'HIVER S'INSTALLE
TU N'EST NI UN DROMADAIRE
NI UN BELIER
TU ES CETTE CHOSE
DEVOREE PAR LES OISEAUX DE PROIE
ET DONT LES FEMMES SE NOURRISSENT.

@SOMALIBOOKS



49. WEEDH

SADDEX WEEDHOOD
OO WAR LAGU HELO
WEYNAW KAA HAY
WEERAR BAA GALAY
WIILKII JIRAY DHIMAY
WEYLI KA MA HADHIN

Tixdani waa duco loogu alla baryaayo in lo'da eebe ka hayo balaayada. Gaar ahaan, weerar col ku soo qaado, wiilka jira ee nafteeda leh oo dhinta iyo neefkiiyoo tafiir la'aan duufa.

PUISSE LE TRES HAUT VOUS PROTEGER
DE TROIS ANNONCES :
LES PILLARDS LES ONT ENLEVES
LEUR BERGER EST MORT
IL N'EN RESTE PLUS UN VEAU

@SOMALIBOOKS

50. WAARIS

HADDUU WEYL DHALO
U SE WEYL KALE
WALACEED YAHAY
U WADADA MARO
WAARIS ODAYLOW

Naflayda inta dhidig ee eebe ku arsaaqo ubad, dhakhsey u illaawaan eedaadka ka soo mara dhalmada. Sacan lagu hal qabsadayna hadduu weyl dhalo, oo isaga oon ka soo kaban diiftii hore tu kale walaceed qaado, wuxuu yeeshaa markuu wadada mari socodka waayeel culus.

LORSQU'ELLE A FAIT UN VEAU
ET QU'ELLE EST ENCORE PLEINE
SA DEMARCHE SUR LE CHEMIN
EST CELLE D'UN VIEILLARD

La femelle en question est déjà pleine sans avoir eu le temps de se rétablir de la naissance précédente.

51. WAABI

WEYSHA KAA YARI
WAA WALASHAA
HA WAREEMINE
WAABIYOO DHAAF

Xooluhu sida dhacda wey kala garaad roon yihiin. Kuwa garaadka sani ku ma taagsadaan intay ka taag roon yihiin, siiba inta yaryar.

Dulucda tixdu ay ina faraysaa, waa in la isku tamar sheegan, oo ka taagta rooni ku durdurin ka si uun uga liita, ee waayuhu wahabka saaray.

TU ES PLUS FORTE QUE LE VEAU
TU ES PLUS GRANDE QUE LUI
MENAGE LE SANS FRAPPER

La chanson s'adresse à une vache qui frappe les veaux.

@SOMALIBOOKS

52. XAY

XIGAALIYO XIDID
MIDNA MA XUSHMADE
XAY MIYAA YIMID ?

Kolka hawsha waraabku socoto gaar ahaan ta lo'du, xayadu inta dalagga ku jirta waa ku iniq, amaba warkeed la ma soo qaado. Cawro la asturaana wey hadhey.

Ka tixda tiriyeyna wuxuu hummaagsadey tiiyoo xigaale iyo xididba lagu baraad laayahay kaalinta oo la iska caabiyo, dar hilinta iyo kala horka lo'da. Kolkuu arkay sicii xay oo soo hor socda lo'duu darka ku sugaayeyna, kuwii xayada iyo hawshoodu is eedeeni waa kuwane kaca oo u guntada waraabintood ayey murti ka noqotey.

XAY EST ARRIVEE
QUI NE RESPECTE
NI LES LIENS DU MARIAGE
NI CEUX DU SANG

Xay est le nom d'une vache.

A leur arrivée au puits, l'exigence des vaches est telle qu'elles font travailler tout le monde.

53. ABEYDIN

AFAR FOOLLAHA
AABO MOOYEE
AAN AF KALE BARAN
ABAYDINIYAAY

Afar fooluhu waa ilmaha gu jirka ah, ee afarta fool ee hore u soo bexeen, af Soomaaligana ka yaqaan aabo.

Waxa jirta sida caadada ah, da' ilmaha in naaska hooyadii laga gooyo ay habboon tahay, aalaaba taasi waxa ay dhacdaa marka ilmuhu yeesho afar fool oo u wax ku yeeli karo naasaheeda. Marka ay ka gabloosho ee u godol ka waayo iyo haddii ay dhimatoba, wuxuu u baahdaa daryeel iyo xanaano guud ka sokow, wax loogu dooriyo caanihii u naasaheeda uu ku qabay. Taana waxa laga helaa naasaha ishinka.

@SOMALIBOOKS

NOURRISSEZ
L'ENFANT QUI MET SES DENTS
ET QUI NE SAIT DIRE
QUE PAPA

C'est lorsque l'enfant a mis ses premières dents que sa mère cesse de le nourrir.

La chanson souligne la faiblesse de l'enfant à cet âge-là et le recommande aux animaux qui doivent désormais l'élever de leur lait.



54. AWLAX

MARKAAN KU ARKAAN
ASHAHAATOON
AWLAXAAN SIDAY
AAYAR TIIRSADAY

Tixdan waxa ka muuqata in kii xilka hawshu saarayd uga soo horeeyey lo'da ama geela ceelkii loo arooray, isaga oo aan nasan qalabkiina xambaarsan ayey isa soo tugeen. Inkastuu filaayey, haddana, wuu ka naxay, oo warankuu sitay ayuu meel ku tiirshey, hawshiina isaga oo daalkii hore qaba ayuu guda galay.

A TA VUE
J'AI PRIE
ET POSE DOUCEMENT
MA LANCE DE COTE

Le chanteur avait précédé son troupeau au puits pour remplir les abreuvoirs mais les animaux sont là, plus vite que prévu.

Il se prépare donc sans tarder à la pénible tâche qui l'attend.

@SOMALIBOOKS

55. AXDI

SOO AROORKIYO
AROOR MAALKUBA
WAA AXDI ALLOO
WAAN ISKU OGAYN

Tixdu waa tu muujinaysa axdi ka dhexeeya, ka leh iyo ishinka. Axdigaas oo ah in geel iyo lo'ba la maalo, laguna intifaaco oontooda, iyana aroor, daaq iyo kolba sida ku habboon lagu dhaqo, lana daryeelo jiritaankooda. Murtidu waa tu ina tuseysa sida aduun weynuhu ama nafleyduba u kala maarmayn ee la iskugu baahan yahay.

TE DONNER DE L'EAU
ME DONNER DU LAIT
C'EST LE PACTE DIVIN
QUI NOUS LIE

56. ABAAL

AROOS KA MA GALIN,
ABEER KA MA QALAN,
IB KA MAAL IYO,
ABAAL SE I MARI.

Sida ka muuqata murtida, tiriyaha tixdani, waa nin wàli guursan oo dooba. Wuxuu sheegey in geela ama lo'diisa habayaraatee wax yarada uu nan ka bixin, ka mana iibsan neef uguba oon wali curan, hase yeeshee wuxuu muujiyay inuu lo'da ama geeliisa sida kale oo dhan ugu galladqabo, abaaldarana ka sheeganayn. Halkaa waxa ka muuqata in naftiisa iyo cid kale toona wax uga hurin, lexejeclona ka waabisay.

MON TROUPEAU NE M'A PAS PERMIS
DE ME MARIER
JE N'AI MÊME PAS TUEE UNE GENISSE
POUR MA SUBSISTANCE
RECONNAIS QUE TU ME DOIS
LAIT ET RECOMPENSE

Le poète qui est un jeune célibataire tient tellement à ses bêtes qu'il ne se résout pas à se marier car il serait obligé de se séparer d'une partie de son cheptel pour payer la dot. Cette cupidité l'empêche aussi d'en donner, comme elle empêche les autres de se servir.

@SOMALIBOOKS

57. AWDAL

AWDAL IIB LEH
AWRKU KARIN LEH
OO IRMAANIDE
SIDEEN U ARADAY

Saylac baa la odhan jiray AWDAL. Tiriyaha tixdu wuxuu neefka u ku halqabsaday u sheegaayey in Awdal ahayd meel laga ganacsan karo oo wixii la geeyaaba iib lahaa. Intaa wuxuu ku daray in awr rarka ogol iyo xoolo irmaan oo lo', adhi iyo geelba le u lahaa. kuwaas oo subagga iyo caanahoodaba awdal loo iib geyn jiray, oo lacagtoodana wax la soo dhaafsado. Wuxuu se la yaabay sababta ugu wacan arradka.

Tixdu waxay ina tusaysaa in xoolaha irmaan had iyo jeer laga dheefin wax buuran oo sida la rabo loogu tarkifalo, ama baahida markaa taagan lagaga boxo. Sidaana waxa la mutaa marka xoolaha intooda irmaani ay gabno yihiin. Waxa dhici karta in isna arintaas oo kale ay la soo daristay. Wuxuu hibanaayey islahaasho la'aanta hawsha ku dhacaysa iyo anfacdarada ka haysata xoolihiisa.

LA VENTE EST BONNE A AWDAL
LE CHAMEAU EST HABITUE A LA MARCHE
ET TU AS DU LAIT POURQUOI MANQUE-JE D'HABIT ?

AWDAL est un ancien nom de la ville de ZEILA.

Le chanteur se plaint de ses animaux qui ne produisent pas suffisamment de lait, alors que toutes les conditions sont réunies pour en tirer un bon prix et s'acheter des vêtements.

58. BARGARAD

WALLEY BIDO DUMAR
OO BARGARAD DHALAY
BAKHAYL INAANTII
WAA NAN BARANINE
KAA MA BIXIYEEN

Iyada oo Soomalidu caado u lahayn in ninna soddoggiis hadal iyo hawraartoona ku aflagaadeeyo, ayaa ninka tixdan tiriyey kala kulmay soddogiis wax ku xambaaray inuu ka baxo xayndaabka dhaqanka.

Saca ama hasha lala hadlaayey waxa loo bixiyey yarad. Ninkana waa la yabdhay, oo walina waa inan la yaal. Wuxuu soddogiis weydiistay inuu saca, ama hasha hebla ugu daro yabadhka. Soddogiina taa wuu diiday, inantuu guursadayna waxay ku noqotay xadhig la ma sitaan.

Isaga oo uurkutaaloonaya aadna uga xun arintaas ayuu neefkii la kulmay, markaasuu xasuustay bariguu ku jiray xeradiisa. Taasaana laga yaabaa iney ka keentay calaacalka uguna wacnayd hibashada.

AU NOM DE DIEU
JE NE T'AURAIS PAS DONNE
POUR UNE MECHANTE FEMME
FILLE D'UN AVARE
MAIS JE NE SAVAIS PAS

Contrairement à la tradition qui garantit le respect du gendre pour son beau-père, le chanteur, ici, se plaint de l'avarice de ce dernier. Ils s'adresse à une chamelle qu'il aimait particulièrement et qui a fait partie de la dot pour son mariage.

Les nouveaux mariés campent avec les parents de la fille. La coutume veut qu'au moment de leur départ pour s'installer chez la famille du mari, la belle-famille leur restitue une partie de la dot.

L'auteur de la chanson a demandé que sa chamelle ou sa vache préférée lui soit rendue.

N'étant pas, par ailleurs satisfait de son épouse, le refus du beau-père lui fait regretter son mariage.

@SOMALIBOOKS

59. BALDHINAYAA

SADDEX LA I BARAY,
WAAN U BUKAAYOO,
WAAN U BALDHINAYAA,
BARIIS IYO SUBAG,
BAWDO INAN WEYN,
WAAN U BUKAAYOO
WAAN U BALDHINAYAA.

Ku guursaday barisamad, oo urquun samo hantiyay, ayaa muddo dabadeed ku laabmay qottonkii lo'du ka cabeysay. Kolkuu baryo ku sii fooganaa daryeelkeed ayuu diif iska dareemay, wuxuuna u hiloobay ooridii iyo dhuunigay isku gacashanayeen. Allaw yaa mar uun kugu ceshaduu uurka ka lahaa ayuu afkuna ka xaday.

ON M'A HABITUE A TROIS VICES
ET J'EN SUIS MALADE,
CAR ILS ME MANQUENT DESESPEREMENT :
CE SONT LE RIZ, LE BEURRE ET LES
CUISSES DES FEMMES,
J'EN SUIS MALADE
CAR ILS ME MANQUENT DESESPEREMENT.

S'étant marié et ayant pris goût au plaisir de la vie conjugale, le chanteur n'a pas le coeur à travailler. Il se rend compte de sa déchéance.



@SOMALIBOOKS

60. GARASHO

SAW CAGTAYDII
CAWSKA KA MA ARAG
SAW CODKAYGII
CEELKA KA MA GARAN

Tiriyuhu wuxuu tixdan ku muujiyey sida hal iyo sac kolba kii u dhaqday u garto socodkiisa marka u maraayo meel caws leh.

Waxa kale oo intaa u raaca, inuu codkiisana ka sooci karo codadka kale marka la joogo ceelka ee hugunka iyo hoobaydu yeedheyso. Dulucda murtiduna waxay ina tuseysaa sida inta dabeecaddu is badday isku qabatiimaan, iskuna afgartaan.

TU RECONNAIS MES TACHES
PARMI LES TOUFFES D'HERBES
TU RECONNAIS MA VOIX
PRES DU PUITS

Le berger reconnaît les traces laissées par ses bêtes; même sur un terrain couvert de végétation et leurs voix parmi tant d'autres du puits.

61. CIISHOON

CASAR GALABEED
OO CADDANKIYO
CEELKA LAGA FULAY
ALLAW ANAD CABAN
OONAD CIISHOON

Sida aroortii loo galo ceelasha, duunyada inta u danbeysaa waxay fulaan shanta galabnimo iyo goor ka horaysa. Kuwa mudadaas dib uga dhaca, waxay noqon karaan kuwa karti laaweyaal wataan, ama ceelashaba loo sheegtay. Lagana yaabee in labada midna sobabtu noqon, oo looga soo horeeyey ceelka, dib u dhacana taasi ugu wacnaato. Ka tixdan reebay, kollaba ma rabin wuuna diidanaa in lagaga hoydo oo intiisuna ku hadho ceelka. Lagana yaabee inuu ahaa ku karti isku ogaa amaba wattay ciidan adag uu isku hallaynaayey. Geesna waa ka duco, eebe ciil ku ma badona way tahay. Aadamaha qaarkiis waxa u caado ah, in dadaalka duco ku ladhaan oo ay ku sabirsiiyaan naftooda.

L'APRES-MIDI,
QUITTES L'ABREUVOIR
ET LE PUITS,
DIEU FASSE QUE TU NE TE PLAIGNES
ET QUE TU NE SOUFFRES.

Les hommes de valeur terminent d'abreuver leur troupeau en fin d'après-midi. Malheur aux retardataires, ils seront considérés par les autres comme des incapables.

@SOMALIBOOKS

62. CATOOTI

DOOB CATOOTI LEH
OO CAD BADHIYA LEH
WAAGA CEELKANA
CIIDAN KUU GALIN
WAA CADAAWEE
MUU COL KAA DILO

Nin intuu buuri iyo qurux u dhashay xaragona u raacday, Hawsha shubaasha se aan ilbax ku ahayn, baa inan yar oo maleegana ah kaalin la wadaagay. Kaa ay ku soo baxday murtidu iyo kuwa la masso ah ayaa marka la rabo' in laga saaro hawsha ay silicinayaan tixdan loogu heesaa. Hadduu se dhaadi waayo ku dhegahadalka, waar na soo dhaaf baa ku xigta.

Soomaalidu cadawga, ka colaadi ka dhaxayso uun uma arkaane, waa kii waxa u ku nool yahay ama dan guud ay ku jirto daryeelna u baahan aan ku dadaalin sida ku habboon ee ku farsan. Dhimashadu, waa miyuu, hadduu nan wax tar u lahayn faa'iido la'aawuhu ka maqnaado fagaaraha ama agteedaba. maahmaahina waa ta leh;

«FAAGAARAHA AMA WAA LAGA
MUUQDAA AMA WAA LAGA
MAQNAADAA».

QUE LE SEIGNEUR TE DEBARRASSE
DU MALADROIT PANSU ET IMPOTENT
SACHE QUE DANS LES TRAVAUX DE PUISAGE
S'IL NE T'ES D'AUCUNE AIDE
IL DEVIENT TON ENNEMI

Cette chanson est destinée au berger corpulent qui a du mal à se mouvoir dans le puits, laissant sur sa soif le troupeau massé autour de l'abreuvoir.

S'il ne saisit pas le sens profond véhiculé par le rythme assez subtil de la chanson, on l'apostrophe crûment et on le jette hors du puits.

Chez les Somalis, l'ennemi n'est pas uniquement celui avec qui vous entretenez des relations de nuisance et de haine réciproque. C'est celui aussi dont l'inaptitude au travail devient nuisible à sa propre personne et à la communauté à laquelle il appartient. Cet état d'esprit est illustrée par le proverbe.

DANS LE CHAMPS DE TRAVAUX
L'IMPOTENCE EST BANNIE
ON S'Y DISTINGUE
OU ON DISPARAIT





@SOMALIBOOKS

63. CIIL

CEELAAN KUU GALAY
CALOOLYOW IYO
CIIL MA KAA HELAY ?

Waxay caddaynaysaa tixdu, in ninka tiriyey is bidaayey nin karti leh oo dadaal badan. Markuu arkay inay lo'dii ama se geelii ay fuleen, ayuu su'aashan isaga oo kalsooni isku qaba, dhegta ugu riday asaagiis, kuna farxad weydiiyey, inay dhacday, in lo'iyo geelba intuu watay iyagoon wabxin darka ka dareereen.

AS-TU JAMAIS EU DES SOUCIS
QUAND C'EST MOI QUI SUIS DESCENDU
DANS LE PUITS
ET QUI T'AI DONNE A BOIRE ?

Le berger est satisfait de s'être acquitté de sa tâche. C'est cette satisfaction qu'il exprime dans ce poème adressé à son cheptel.

64. CID

CEELALYADA HORE
CIIDAN ADAG IYO
CID MA KU LAHAYD ?

Wuxuu tiriyuhu su'aalayaa, inay cid ka sii horaysay jirto, oo ceelba ceelka u ka biyo badan yahay u xusha, siina hubisa naanidu inay tahay tu jaban iyo in kale oo isla markaana u buuxisa darka, kana celisa ceelka kuwa isku daya inay ka cabbaan. Haddii ceelalyadu jirin, waa lagu jactadaa shuubaasha, xooluhuna wey ku hunguri juqjuqaan. Weyna dhacdaa haddii iyada la'aanteed la arooro in ceel biyo yari ku soo hagaago, ama kuwii kalka uga horeeyey horta fulaan, oo iyaguna ku gabalsadaan waraabinta ishinka ay wattaan.

AS-TU DEJA ENVOYE
DES ECLAIREURS
ET UNE ARMEE EXPERIMENTEE
POUR PREPARER LE TERRAIN
AU TROUPEAU QUE TU MENES AU PUITS ?

Avant de mener les bêtes au puits, des hommes sont envoyés en éclaireurs pour choisir les puits d'eau et des abreuvoirs en bon état.

Ils préparent ainsi le terrain aux bêtes.

@SOMALIBOOKS

65. CILLAAN

KAALINTA CILLAN
EE RAG KA CABSADAY
ADAA IGU CESHOO
ADAA IGU CILLALAY

Ceelka cillaan ee dhawrka nin shubto, waa ku rag ka wada cabsaday oo cidhiidhiya. Dani waa seetee, isna danta guud iyo baahida geela ama lo'da u wattey ayaa gayisiisey inuu ceelkaas kaalinta adag u gunta u galo.

TU M'AS OBLIGE
A RETOURNER
A CETTE PLACE ETROITE
CRAINTE PAR LES HOMMES

Pour faire boire ses animaux , le chanteur est obligé d'aller se placer à un endroit étroit et dangereux à l'intérieur du puits.

66. KAALIN

KAALINTAAN DEGO
EEN DARKA AHAYN
HADDAAN DOORSADO
INTA DUUSHIYO
DUUFKA MAAN CUNO

Soomaalida waxa u xeera in biyaha ceelka nin waliba kolkiisa cabbo, Kaalintana ka baxo marka u toogadiisa dhammaysto. Waxay heestu sheegeysaa, in Soomaalida reer miyiga ah dhaqankooda ku jirin, in shinbiraha iyo wixii duulee kaleba aan hilbkooda la cunin. Waxayna u la siman yihiin duufka aan la gayin.

Isna hadduu hawsha u galo ka soo bixin, wuxuu isku tiriyey nin wax ma tare ah, oon waxba ku filleyn. Abaalkiisuna yahay inuu ku noolaado bakhtiga iyo wixii duula ee shinbiruhu ka mid yihiin.



@SOMALIBOOKS

SI J'ECHANGE MON POSTE
QUI N'EST PAS CELUI DE L'ABREUVOIR
QUE JE MANGE LES OISEAUX
ET LES CADAVRES D'ANIMAUX

Dans les régions désertiques les puits sont profonds et ont peu d'eau. Les nomades pour boire ou abreuver leurs animaux sont obligés de descendre à plusieurs dans le puits. Ils se placent à intervalles réguliers sur toute sa profondeur et tirent l'eau avec un seau qu'ils font circuler de l'un à l'autre jusqu'à la surface. Il faut attraper le seau et le lancer au suivant sans perdre ni son équilibre ni une goutte de l'eau précieuse. Le dernier se contente de remplir l'abreuvoir ou les jarres, son travail est le plus facile. En plus d'un apprentissage nécessaire, la chanson qui rythme et synchronise leurs mouvements est absolument indispensable. Cette chanson qui les encourage à persévérer, nous apprend aussi que les nomades ne mangent pas les animaux qui volent et ceux qui n'ont pas été égorgés.

67. HA IGU DILIN

DARKIIBA ARKEE
ALLOW DIRIRTAA
DAD LA 'AANEED
HA IGU DILINOO
HA IGU SOO DAYN

Kolkuu kibbaarmay ka qotonka ku jiray, ee u neef dhabay, ayuu xasuustay, in dirir loo galaana kaba sii daran tahay. Deeto waaka ka ducaystay, in eebe badin tu kali ahaantiis qabsata oo uu naan waliba ku geeriyoon.

DONNER A BOIRE AUX ANIMAUX
EST DEJA DIFFICILE !
DIEU ME GARDE
DE CETTE GUERRE
QUI SEME LA MORT.

Trimant au fonds du puits, il commence à s'essouffler. Il se rend compte alors qu'il ne peut se défendre sans difficulté dans une telle situation au cas où une guerre se déclarerait.

@SOMALIBOOKS

68. LAWGA

LAWGA DALABTA LEH,
EE DADBINAHA LEH,
WEY DULDHIGI JIRAY,
ANNA MEEL DARAN,
WAWGA DARI JIRAY.

Waxa u caado ah in lo' da iyo geeluba dul baxaan ka darka shuba, ama se waraabiyaha, iskuna maqiiqaan biyaha. Waxa tixda ka muuqata in ninku ku caanbaxay lexejeclo. Taana waxa ka marag kacaysa, in kolka geel iyo lo', kolba ka loo jeeday soo dargalay, isna u dhib kasta ka indho la' aaday, oo u galay hawl waraab, kiiyoon xaallayn halisteed iyo dhibteed, kuna hamiyay- siday u fuli lahaayeen.

SON GENOU TORDU
IL LE POSAIT SUR MOI
ET MOI, DIFFICILEMENT
JE LUI DONNAIS A BOIRE

Les boeufs et les dromadaires ont l'habitude de bousculer celui qui alimente l'abreuvoir en eau ou de se jeter dans l'abreuvoir même. Le poète continue cependant à abreuver les bêtes malgré les difficultés qui l'assaillent.

@SOMALIBOOKS

69. DHAAN

AWRA DHAAN BUU
DHAAMI LEEYAHAY
ANNA DHABARKIYO
MEEL DHEXDAAYAAN
DHAWR IS LEEYAHAY

Tixdu waxay muujinaysaa in ka darka shubaayey u daalay, dhabarkana dhibaato awgeed uga foorarsan waayey. Wuxuuna dherersaday neefka si u dhaan dhaaminaayo, biyaha ku sii ganooday.

Labadu, kala war la ; midi xilka saaraa buu lahaa ha ka badh tegin, ee sida ku habboon u oofi, daalla wuu u dheeraa. ka kalina in u dhiman darteed ayuu ugu sii jeeday biyaha, oonkana reeb buu is lahaa.

Ujeedada tixdu waa tu sheegeysa in qofkii xil saaran yahayba u nasan karo kolkuu waajibkiisa sida la rabo uga soo baxo. hawlina qabyo ku ma farsama ayey dulucdu tahay.

LE CHAMEAU DOIT FAIRE
SA RESERVE D'EAU
ET MOI PLIE EN DEUX
JE VOUDRAIS REPOSER MON DOS

Le chameau résiste longtemps à la soif, mais une fois au puits, il doit boire beaucoup d'eau.



70. DHOOBO

RAGGAN DHOOBADA
KUUGU DHAASHADAY
NINNA DHEEF BUU
KUUGU DHAQAYAA
NINNA DHAQASHUU
KUUGU DHABAR JABAY

Dhammaan nimanka kuu ciidmaya, ee dhoobadu oogadooda wada qarisay lana moodo iney ku subkadeen, kuna dhaashadeen, waa dartaa waxay u muteen dhibaatada iyo dan ay kugu qabaan. Ka ku sheeganayaa ha kuu taranto ayuu kuugu dhabar jabay, ka ciidanka ihina ku noolaw ayuu kuugu kacaa kufayaa. Murtidan nuxurkeedu waxay inoo sheegeysaa sida loo adeegaha iyo u adeeguhu iskugu baahan yihiin. Taasaana la timid in lihiiluhu u baahdo ciidan, ka ciidanka ahna fartay inuu maalo muruqiisa oo u ku noolaado.

PARMI CES HOMMES
MAQUILLES DE BOUE
CERTAINS S'ATTACHENT A TOI
POUR SE NOURRIR
D'AUTRES SE FATIGUENT
POUR LA PROSPERITE

Les motivations des hommes qui pour donner à boire à leurs animaux, n'hésitent pas à se tremper dans la possession d'un troupeau abondant et soigné.

@SOMALIBOOKS

71. FARAW

SIDII FARAW DIDAY
OY FARDO ERYEEN
WAAN LA FUULIN
FUQII HOOSIYO
FANKII WADA DADAB
OO FULLIIN DAMAC

Farawgu waa jaad ka mid ah gammaanka, oo dibad galeena. Wuxuu leeyahay oogo daliigo dhaadheer, iskuguna dhafan caddaan iyo madow. Marka farso lagu eryo, ama si kaleba loo baacsado, wey fan jeediyaan. waa sidoo kale lo'da iyo geeluna, marka ay darka ka fulaan ayey caasha u dadbaan tubtay ka soo arooreen.

TELS DES ZEBRES EFFRAYES
POURSUIVIS PAR DES CAVALIERS
ILS TENDENT LEURS COUS
TELS DES CHEVAUX SANS CAVALIERS
ET RASSASIES, ELLES VEULENT S'EN ALLER

Le chanteur s'adresse à un troupeau de vaches ou de chameaux qui a fini de boire.

Les animaux se tournent tous vers le chemin du retour, ils sont impatients de rejoindre leur campement situé souvent à plusieurs heures de marche.

72. JIILAAL

MARKII FIDHIMADA
FARTA BIDIX IYO
FOODDA LAGU SIDAY
FIDHMAW JIILAAL
GEDDAA INUU FALI
OO FARXUMO DHICI
SOO MA FILAYN

Dhalinyaradu marka ay sindheerta yihiin ama se baaluqa, aad ayey u xarago badan yihiin, kibirkoodana loo ma adkaysan karo, oo waaba dheeraad. Kaalinta ceelkana iska ma xajiyaan, ilaa ay muruqyadoodu adkaadaan. Barwaaqaduna wey u been sheegtaa, oo mudadaas yar fadhoocintooda loo ma adhkaysan karo. Adeegga loo dirana sida la rabo uma oofiyaan. Maanta iyo barina iney masoobi karin ka ma dhaadhacsana, kayd dhigashadeedna ka ma fikiraan. Wakhtiga ay heestu soo ifbaxday wuxuu ahaa jiilaal cadaadi naflaydu dhibsatay. Fidhin lihiina waxa ku soo baxsatay hawshii, urquun darona wey u raacday. Heestuna waxa ay tix tiriyaha ku so dhacday markuu milicsaday fidhin lihii oo gorofkii la baxaa degaaya. Inkastuu ulajeeday fidhin laha, haddana dulucdu ka ma taggana kuwa la midka ah, een wax tashiilan.

LORSQU'ILS PORTAIENT LES PEIGNES
A LA MAIN GAUCHE
OU DANS LES CHEVEUX
JE SAVAIS
QUE LA SAISON SECHE
ALLAIT SEMER LA DESOLATION
ET LA HONTE

Le chanteur prend le troupeau à témoin pour souligner l'inexpérience des jeunes face à la vie dure de la brousse. Pendant la bonne saison ces jeunes, une fois repus avec le lait abondant, ne pensent qu'à leur toilette et oublient d'effectuer les travaux nécessaires à la préparation de la mauvaise saison. La saison sèche est arrivée et voilà leur joie transformée en tristesse.

@SOMALIBOOKS

73. GOTIN

ANOO GAABNAA
OO GANTOOBNAA
KAALIN GIGAN IYO
MEEL GOTINA GALAY
OO MA GANI KARO

Waxa dhici karta in ka waraabka lahaa ay ku soo hagaagtay meel isku darsatay gignaan iyo godnaan, oo kor looga bidhi karin gorofka. Markuu iska waayey hannaankii iyo shubaashuu isku yiqiin, ayuu iska xogwramay oo u yidhi ; aniga oo markaygii horeba aad u gaabnaa, ayaan hoos u sii galay meel sii godan, oo waliba gigan, gorofkana kor looga gani karin.

Ujeedaduna, waa ka afeef dhigasho iyo in la garwaaqsado dhibaatada shubaasha ee ka timaad godnaashaha iyo gignaanta ceelka. Taas oo keeni karta in silic iyo gesenges ay ku cabbaan lo' iyo geel kolba kuwa darka jooga ee ujeedadu u dhacayso. Intaa waxa raaca in hawsha jaadkaasa aan la isku quudhsan.

J'ETAIS DEJA PETIT
ET RABOUGRI
MA PLACE EST ETROITE
ET LOIN DE LA SURFACE
JE NE PEUX PLUS LANCER

Le chanteur est mal placé au puits et voudrait bien être relayé.

74. GUNNAHA

HADDUU SOO GALAY
HORTII SE AAN GALAY
OON GUNNAHA TEGAY
MUXUU IGA GURI

Ninba mar buu xoolaha u wato ugu dhaadhacaa ceelka oo u fuliyaa. Murtidanna waxa ka muuqata in heesaagu markuu ceelkii ku dhaadhacay ee u darkii biyeeyey ay lo' dii ama geelii isa soo tugeen. Deeto isaga oo ku naaloonaya tabaabulshihiisii wanaagsanaa ayuu heestaan tiriyey.

SI SON TOUR ARRIVE
APRES MA DESCENTE
AU FOND DU PUITS
JE SUIS TRANQUILLE

Le troupeau se présente au puits alors que le berger à déjà tiré l'eau et rempli l'abreuvoir.

@SOMALIBOOKS

75. GAR IYO DHIXIDH

HABEENKAAN GUDO
EEN GEYAAN HELO
EEN GAR IYO DHIXIDH
MEEL IS GARAB DHIGO
GARAAD BADANUHU
WEY IGA GARAN JIRAY

Raggii hore xoog iyo xugunba wey kaydin jireen. Aadna wey iskaga ururin jireen wixii ay u arkaan inuu labada ama midkood wax ka ridaayo. Tixdan kii tiriyay, wuxuu dareemay in shubaashii iyo dardartii uu isku yiqiin ay kala dhataalmeen. Markuu arkay lo' iyo geel kuwuu hawshooda ku guda jiray oo qabdhamayana wuxuu eersadey galmadii habeen kaas.

LA NUIT OU JE SORS
SI JE TROUVE UNE FILLE
SI JE LUI OTE
SON PAGNE ET SA CEINTURE
ELLES LE SAURONT

Au lendemain d'une nuit d'amour, le chanteur n'a plus assez de force pour tirer l'eau du puits; Ils ressent les beuglements d'impatience de ses vaches comme autant de reproches.

@SOMALIBOOKS

76. GABAAD

NIN MAR GUURSADAY
OO GABBAAD IYO
GAANA DUMAR HELAY
GABAWYE OGOW
OO KA GURI DAYO

Hadduu nin guursado, doobnimana ka baxo, waa nin jago doorsaday, nolol dabacsanna helay, oo ay ka mid yihiin, dhuuniga, amar ku taakulaynta iyo gogol diiran. Intuba waxay ula yimaadaan culays u qabi jirin iyo wahsi. Waxaana dhici karta inuu san u hagartirin xoolaha, siduu baryo qarkood u ahaana u noqon. Ka meel dayashadu maaha tu loola jeedo inay ka jago doorsato, ee waa tu dulucdeed tahay, cid kaalintuu gali jiray

buuxisa iyaa loo baahan yahay, in loo helo. Halkaa waxa ka muuqata inuu doobnimadii iyada uun ku tagoogsanaa, mar haddii qoys la dhisayna ay beylahdii badatay. Haddii walaal ama wiil la dhalay oo kaalinta madhan buuxiya la waayo, waa in midiidin wax ka dheefa iyana dhaqa loo raadiyo.

UN HOMME QUI EST MARIE
ET QUI VIT DANS UN FOYER
AVEC UNE JEUNE FEMME
SACHE QU'IL A VIEILLI
TU DOIS LE QUITTER
ET CHERCHER REFUGE AILLEURS

L'homme, quand il se marie, se met à mener une vie facile : il donne les ordres, consomme une nourriture toujours à sa portée et dispose d'une couche tiède. Cette vie le rend paresseux, il exécute les travaux difficiles. Il prend donc une aide.

77. GURMAD

GURMAD KAAGOON
GEENYO BADISIYO
WIIL GADOODIYO
GUUTO ADAG IYO
GEESIYAAL WADAN
GALBAYE OGOOW
OO HA SUGINE GUUL

Tixdu lo' iyo geel, kii la rabo ha loola jeedee, waa tu ka maragkacaysa; in haddii aan loo hayn cudud, geesi, hub iyo gaadiid, sida col looga badbaadiyaa ay adag tahay. Haddii la dhacona waxba aan loogu filleyn. Murtidu waa tu in faraysa in dhaqashada duunyada garab iyo gaashaan loo hayo. Ama xeer adag oo cadaalad garabsanaayaa u jiraa.

SI UNE JUMENT RAPIDE
UN GARCON EN COLERE
ET UNE FORTE TROUPE
CONDUITE PAR DES BRAVES
NE VIENNENT PAS A TON SECOURS
SACHE QUE TU ES PERDU
ET N'ESPERE PAS DE VICTOIRE

NDT : En cas de guerre, le pillage des troupeaux de la tribu ennemi se pratique couramment chez les nomades. Il constitue un défi dont les victimes pour récupérer leurs biens, doivent s'organiser rapidement, rattraper les pillards et livrer une dure bataille.

C'est ce que le chanteur rappelle ici à son tour.

@SOMALIBOOKS

78. HAYBSI

HABEENKII XALAY,
KUU MA HOYANINE,
WAAN KU HAYBSADAY,
WAAN SE KU HAYAA.

Inkastuu u hooyday meel fog, haddana xilkii saaraa ma u moogeyn. Waa kii ku taama hawsha een marra aan baylihin. Tixdu waxa ay muujinaysaa inuu maqaaman u ahaa siduu u qumin lahaa hawsha waraabka. Halkaa waxa ka muuqata in kii xilkas ihi, meel kastuu kaga eedan yahay dalagiisa uu nan sina uga maqnaan. Goortii loo qoondeeyona isagoon la tabin taabo, oo u halkay kaalintiis ahayd ka galo hawsha.

LA NUIT,
JE NE L'AI PAS PASSÉE AVEC TOI
JE SUIS PARTI A TA RECHERCHE
MAINTENANT, JE TE TIENS.

Bien qu'il ait passé la nuit loin du campement, le poète n'a pas failli à ses obligations. Il est revenu parmi son cheptel.

79. HAFSAD

KII HAFSADAY IYO
KII HANTIDEED DHAQAY
KII HAFSADAY BAA
MAAXDA HIGILKA AH
HORAY ISKUGU RIDA

Dadka qaar baa ku dhiijista caanaha sacabada, afka ama gorof, yaalaana waxa sidaa yeela, kuwa lo'da iyo geela jira. Waana mid ka mid ah kuwaas ka iska xogwaramay. Wuxuu sheegayaa in iyaga dhibaato kastaa soo food saarto, oo si ka lihi ugu hawshoon ugu hawshoodaan , oo ay ugu dibjiraan. Sayma adag iyo suun walba wey u maraan, waxay ugu dhaadhacaan ceel muddo aan laga cabbin, maaxdiisuna higil noqotay, taas oo laga yaabo in noloshoodu halis ku gasho.

ENTRE CELUI QUI A GOUTE SON LAIT
ET CELUI A QUI ELLE APPARTIENT
CELUI QUI A GOUTE SON LAIT
SE JETTE LE PREMIER
DANS L'EAU TROUBLE DU PUITS

Le berger qui peut boire leur lait à tout moment de la journée aime et soigne davantage les animaux que leur propriétaire.

NDT : Le mot HAFSAD traduit ici par «goûter», exprime l'action de traire un animal au pâturage dans le creux de la main pour atténuer sa soif.

@SOMALIBOOKS

80 HARA GODAN

SIDII HARA GODAN
OO HILLAAC MARAY
DARKII MA HILLIYEY

Markuu roob aad u weyni da'o, meeshii biyo fadhiisin lihiba wey buuxsantaa. Darkuna sidoo kale ayuu noqdaa kolka rag karti lihi ay shubayaan wuuna fatahaa. Xooluhuna si fudud ayey u kala hormaan. Tixdu waxay tilmaamaysa kartida iyo hufnaanta u hawl wadeenku la yimid.

L'EAU ONDULE DANS L'ABREUVOIR
COMME DANS UN ETANG PROFOND
SOUS UN ECLAIR D'AVERSE

Le chanteur est satisfait d' avoir tiré beaucoup d' eau du puits et rempli l' abreuvoir.

81. DOOB

DOOBKA HAYDALI
ADAA HIIGAYE
HABLO UMA GUDIN

Taag darada waxa ugu wacan doobka waa dhibaato ka so gaadhey hawl culus iyo dadaalkuu ugu jiray daryeelka xoolaha. Uma se galmoon hablo.

Waxa kale oo laga dhadhansan karaa tixdan, in dadkii hore ay rumaysnaayeen, haddii u galmooshaha dumarka la badsado in la taagdareeyo, oon karti loo yeelan hawsha kakan.

CE JEUNE HOMME MAIGRE
N'A PAS COURTISE DES FILLES
C'EST TOI QUI L'A EPUISE

@SOMALIBOOKS

82. HEES ADHI

KOLKA HEESTII,
WAA LA HOOGAYE,
SIDII HUUMADA,
AMA HEES ADHI,
HOOS MA LOO DHIGAY.

Isku jiibintii heesaha, iyaa markii la daalay hoos loo dhigay sidii heesta adhiga. Codkii wacnaa wuxuu la midnoqday ka huumada een la jeclaysan maqalkiisa. Taasi waxay ka marag kacaysaa in hawshii lagu noogaba kolla sidii bilawgii lagu wadeyn, oo ka nasashadeed habboon tahay. Ta shubaasha se, haddii ciidan kali jirin dib loo ma dhigtee cagajiid baa lagu fuliyaa.

VOILA QUE FATIGUE
ON CHANTE A VOIX BASSE
COMME UN HIBOU
COMME QUAND ON CHANTE
UN CHANT PASTORAL

Pour mieux soutenir le système du travail, on se met à chanter.

Mais bientôt, on commence à baisser la voix, comme quand on chante un chant pastoral. La belle voix du chanteur rappelle alors celle du hibou.

Cela montre qu'on ne fait pas un travail du début à la fin toujours avec la même cadence on finit par traîner les pieds si l'on n'est pas aidé.

83. HAAD WEYN

DARKII LOO HELAY
MARKUU HALACSADAY
SIDII HAAD WEYN
OO HAL LOO DILAY
MA U HILAABTOO
MA U HAMBALAQ YIDHI

Darkii ishinka loo sahamiyey, ee la gartay inuu baahitiro, markii la dul keenay, ee ay arkeen inuu darku ceegaago, ayey sidii haad hal loo dilay ku qamaameen biyihii, iskuna tuureen. Halkaa waxa ka muuqata inuu tiriyaha tixdu inoo sawiray sida lo' iyo geelba kolka oon dabada ka wado yee-lankood yahay.

LORSQU' IL A APERCU
L'ABREUVOIR QU'ON LUI DESTINAIT,
COMME UN GRAND OISEAU DE PROIE
QUI DECOUVRE UN CADAVRE,
LE VOILA QUI S'Y JETTE
ET LE COUVRE DE SON CORPS.

Dès qu'elle s'approche de l'abreuvoir plein d'eau, la bête se conduit comme un oiseau de proie qui a découvert une charogne.

@SOMALIBOOKS

84. HIRDAN

MEEL RAG KU HIRDAMAY,
OO HUB YAALYAAL,
OO HAWEENKUNA,
HOOGEY LEEYAHAY,
IYAA LAGAA HELAY,
OO MA HAWL YARID.

Waxa laga yaabaa, in ka tixda reebay xoolaha u warabkooda ku hawlanaa in booli ihi ku jirtay. dagaalkii lagu soo dhacayna dad fara badani labada dhinacba kaga hoobteen, oo hoogayda dumar ciirsi waa-yeyna dhinac kasta ka yeedhay. Dhacdee, in ka murtidu ka hadhay, kolkay daashatay shubaashu, dagaalkii ku xasuustay intii boollida ahayd ee ku lamaanayd hormada. Hawshii cuslayd iyo dagaalkii lo'da ama geela lagu helay baa ka yeedhsiisay in hawsheeda iyo siday ku timid kollaba saleelo lagu sheegi karin.

ON T'AS EMPORTE DE VIVE LUTTE
SUR UN CHAMP DE BATAILLE
PARSEME D'ARMES ET DE VICTIMES,
OU LES FEMMES
CRIENT LEUR MALHEUR :
TU NE NOUS EPARGNES AUCUNE PEINE

Il se peut que parmi le bétail qu'abreuve le berger se trouvent des bêtes provenant d'une razzia au cours de laquelle, il y eut beaucoup de morts dans les deux camps.

Et il continue à les soigner sans ménager sa force.



@SOMALIBOOKS



85. LAAFYO

WIILAAN LAAFYAHA
KUU LABAA ROGIN
ADNA NAASAHA HA U LULINOO
HA UGA LABAQSIIN

Nimaan u hawlgalin dantaa, oon u kacaakufin dartaa, adna dheefta naasahaaga ha ugu roonaan, hana baahitirin. Taas oo ka dhigan, qofkii daryeelka naftiisa iyo dalagiisa aan ku dadaalin ma habboona in wandhacaad u wax ku helo.

POUR UN GARCON DONT LES BRAS
N'ONT PAS TRAVAILLE POUR TOI
N'AGITE PAS
ET NE BALANCE PAS
TES MAMELLES

@SOMALIBOOKS

86. MADI

HADDII MADI DHACO
OO MID KALE JIRIN
REERKU MEERYOO
MEEL KALUU DEGEY

Tixdan waxa ka muuqta inuu tiriyey nin madi ahaa. Waxayna leedahay haddii ka madiga ihi u geeriyoodo, oo uu nan lahayn wiil iyo walaal kolba kii dhaxli lahaa, aduunkiisu wuxuu u wareegaa nin aan magaciisa iyo ka aabihii toona sii wadin.

SI UN FILS UNIQUE MEURT
SANS PERSONNE POUR PRENDRE SA RELEVE
SON CAMPEMENT EST PERDU
ET RECUEILLI PAR D'AUTRES

Cette chanson exprime la crainte du fils unique de disparaître avant d'avoir lui-même des fils assez grands pour prendre sa succession.

Si cela arrive, son nom et celui de son père risquent de ne pas se transmettre puisque sa femme, ses enfants en bas âges et ses biens tombent dans des mains étrangères.

NDT : Le mot REER traduit ici par campement est un nom désignant tout ce qui appartient à un nomade : femme, enfants, tentes et animaux.

@SOMALIBOOKS

87. MAAMA

NIN MAGAALADA
SOO MARAANMARAY
OO MAAKHADAYN JIRAY
OO MIJACAS DUMAR
MARTA LA HUWADAY
WALEE MAAMAAY
MAALINTII CEEL
KUU MADDEYN WAA

Fikradda la qaabaa ama runba ihi, waxay tahay, haddii nin ka tago baadiyaha, oo u tago magaalada, dhaqanka yaalna in muddo ah ku meelmaro, hawl fudud iyo haasaawana u badsado, kolkuu ku noqdo baadiyaha siduu u qabatiimo nolosha waa tii muddo ka qaadata. Shubaasha ceelkana sidii baryo qarkood ku ma noqdo, oo wuu la daalaa dhacaa, waxna ka ma taro.

Ujeedadu, waa hawshii la tab iyo farsamo barto, kol haddii lagu doorsado tu kale baryona laga maqnaado, sida loogu nooqdaa intay adag tahay, ayuu ku rogaal celiyuhuna muddo la rafaadaa. Taasi waa tu nin baadiye uun u gaar ahayn, ee kii ka jagadoorsada farsamaduu ku dhaqmi jiray, hadduu baryo dabadood ku laabto, dib u qabatiimadeedu wey ku adkaataa.

CELUI QUI COURT LA VILLE
ET LE JUPONS
SE REVELERA INUTILE
O MAAMAY
CAR IL FAUDRA BIENTOT SORTIR L'EAU DU PUITS TARI.

Lorsqu'un homme quitte la brousse pour la ville, il ne tarde pas a s'habituer à la vie citadine.

Il aura du mal, s'il revient à la campagne, de donner à boire aux animaux.

88. SOO HIRO

MARKAAN MAQANAHAY
AMA MEEL TEGO
EEN MURUQYADA
KUU MITAMINEYN :
AD MEERMEERTIDE
MAANTA SOO HIRO

Sida runtu tahay, hawlba ninkeed baa daryeela. Tixduna si toosa ayey u taabanaysaa arintaas. Waxaana muuqata in neefka lagu halqabsaday uu nan marraba hagarbeelayn hadduu nan darka u joogin kii lahaa, oo u hormadeedana kala wadayn. Ujeedadu waa hawlba ninkeed baa baylahtira. Hadduu nan gacanta ku haynna baylahsanaan baa hurran.

LORSQUE JE SERAI ABSENT
ET QUE MES MUSCLES
NE TRAVAILLERONT PAS POUR TOI
TU POURRAS TRAINER
MAIS AUJOURD'HUI VIENS DROIT AU PUITS

Cette chanson sert à conduire le troupeau au puits. Elle exprime la volonté du berger prêt à fournir tout le travail nécessaire pour tirer l'eau et désaltérer ses animaux.

@SOMALIBOOKS

89. MAALIS

DOOB MIRMIRA YARI
MARTI KA MA SEDO
MAYRAC KU MA SUGO
MEEL XUN KA MA SHUBO
MAALISTEEDU MAQAAMAN U YAHAY

Ka tiriyay heestu, wuxuu la kulmay ama dani wadaajisay hawl, doob karti laawe ah oon sina kaalintiisa uga bixi karin. Wuxuu arkay kiiyoo dhuuniga inuu bursado mooyee aan kollaba yareysan. Waa markaa, markuu gocasho reemay, ee u yidhi, meel cidhiidhyoona ka ma saaro, mayracana ugu ma roona taag laawe, inuu maaluu se heegan u yahay, oo ma ogola in iniq laga bursado dheefta duunyada la sheegaayo. Kaasookale meel kasta wuu joogaa, in waabisa oo u run sheegtaa wey jirtaa, in gefka gacan ku siisa oo u sad burisana waa la arkaa.

O JEUNE GRINGALET IMPATIENT
INCAPABLE DE DONNER L'HOSPITALITE
ET DE PUISER L'EAU AUX PUITS DIFFICILES,
MAIS POUR QUI TRAIRE UNE VACHE EST EXQUIS !

Le poète a eu à travailler avec un jeune homme dont la seule compétence consiste à s'adjuger la part du lion quand il s'agit de manger. Incapable de s'acquitter des tâches qui lui incombent, il se révèle de surcroît un parasite qui ne connaît pas la générosité.

90. NOOLI

NOOLI KULANTEE
NAASAHAAGAAN
NAQ DANBEED IYO
NAALLO KU OGAHAY

Tiriyuhu wuxuu tixdan tiriyey xilli neefkii u maali jiray caano gabay. Isaga oo la hadlaaya ayey murtidiisu leedahay, haddii neef yahaw xusulkeen ka sareeyo xabaal, oo ay nu waaro, waxa hubaal ah in ay nu kulmi doono, oo aan illaawi wixii dhibaato iga kaa soo gaadhay, waana naasahaaga kuwa aan ku ogahay inaan ka heli abaalka aan rabo. Dulucda heestu waxay tahay, in wixii loo dadaalo wuxuun laga dheefi loona aayi.

AU REVOIR,
TES MAMELLES
ME RESERVENT
D'AUTRES NOURRITURES

Le berger chante cette chanson lorsqu'il donne à boire à des vaches pleines qui ont cessé de donner du lait. Sa peine ne sera récompensée que plus tard, lorsqu' elles mettront bas.

@SOMALIBOOKS

91. AL KUMID

DARKA RIBADA AH
EE RAGGU ALKUMAY
RIXIMAYSIDE
HA ISA SOO RIDIN

Tixdu waa tu lo' iyo geel ka siman oo kolba kii la rabo loogu heesi karo. Waxay leedahay, darka rag baa ku farayaraystay oo farsamadoodii iskugu geeyey, aadna wuu u adag yahay oo riixi karimaysaane si miyir qabta u soo horma oo u kala fula. Ujeedaduna waa sabirka in la moogaan, hana lagu darsado hab iyo hanaan, asluub iyo anshaxna u yihiin sal.

NE VOUS JETEZ PAS
SUR CET ABREUVOIR SOLIDE
CONCU PAR LES HOMMES
IL NE BOUGERA PAS.

92. SIISO

AMBA SAGALKIYO
SAY U SOCOTIYO
SIISADA ARKAYE
MAAN U SARAKACO

Wuxuu dhawraayay lo' iyo geel midkood, oo kaga danbeeyey reerkii. Isaga oo si u wandhacaada ayay leexadii ka soo kacday meel fog. Waxa la foolxumaatay in isaga oon hawshii sii badh qaban la dul yimaad, oo u kabashkabashleeyo. Waxay la noqotay inuu darka biyeyntii u kaco, si ay degdeg duunyadu ugu fushona tabteed u galo. Sidii buu yeeluu ku qumiyey xilkii saaraa. Hawlina yaryaraysi ma leh, dib u dhigashona ku ma habboona, ee wixii gacanta loo qaadoba waa in sidii ku farsan lagu fuliyo ayey dantu ku jirtaa.

LA POUSSIERE QUI S'ELEVE,
SON ALLURE, JE VOIS TOUT CELA
QU'AI-JE DONC A RESTER ASSIS ?

Le berger s'adonne à la paresse. Il ne tarde pas à voir au loin la colonne de poussière que soulève la marche des troupeaux qui se dirigent vers lui.

Or il n'a pas encore rempli l'abreuvoir. Il se met donc au travail en récitant ce poème.

93. WILL

MARKAY SIDAN TAHAY
SALOOLANE WIIL
OO SI RAG U BAXAY
BAA KA SEDA CEEL

Markay abaari dhaharato ee aroorka iyo guulkuna ay bataan waxa xoolaha ka saara saxariirka sabatana bixin kara, wiil adkaysi badan dadaalla u dheer yahay.

PAR CES TEMPS-CI
SEUL UN GARCON TRAVAILLEUR
BATI COMME UN HOMME
PEUT TE DONNER A BOIRE

Il s'agit d'une période de sécheresse ou les puits sont rares et l'eau très basse.

@SOMALIBOOKS

94. SIGLE

SUFTI MA IHIYE
SAAR MA TUMANINE
SIGLAHAAGAAN
SAAKA DHAMAY BAA
CADKA SARARTIYO
SEEDDA IGA GALAY
OON LA SARA KACAY

Suftigu waa nin jidbo ciyaareed gashay, haasaawe dumarna ugu dhawaanaya. Waxa dhacda inuu habeenkii intiisa badan u ku dhaafo ciyaar. Waagu markuu baryona isaga oo burbursan xubin u qaadi karaana jirin hurdada ka kaco. Ka saarka tuntaana dhaqdhaqaaqa badan ee u sameeyo ayuu ku daalaa. Labadaba muruqyada ayaa jilca weyna adag tahay si ay ku fuliyaan wixii adeega ee looga baahdo. Tiriyaha tixdani midna isku ma sheegin, wuxuu se dhamay dambar neef ugub, oo lo'a ama geela. Sida caadadu tahayna marka la badsado dambarka neefka ugub ee labda midkood ah waa lagu sirinsirqoobaa. Waana isaga ka xubnaha ka galay ee u la soo kiciwaayey ka tixda reebay.



JE NE SUIS PAS UN FANATIQUE
JE N'AI PAS CHASSE LES ESPRITS
C'EST TON PREMIER LAIT
BU CE MATIN
EN ME LEVANT
QUI M'A RAMOLLI
LES MUSCLES ET LES TENDONS.

Les mystiques exécutent des chants et des danses religieux pendant une grande partie de la nuit.

Il existe aussi, selon des croyances anciennes, des danses rituelles servant à satisfaire des êtres invisibles vivant parmi les hommes et dont la colère peut entraîner des maladies. Le chanteur ne s'est pas livré à ces chants et danses, mais il s'est enivré avec le lait d'une vache qui vient de mettre bas.



@SOMALIBOOKS

95. TAMAR

AMBA TAAGTAY
KOLLA TAMARTAY
WAXAAN TARI KARO
KUU LA TAAGNIYE
HA IGU TURANNOO
HA IGU SII TUMAN

Togba taagtiis rogmay, anna intaan ciidmi karo ee awooday tahay ayaan qaban, hawlahaaga iyo kolba sidii dhaqmahaaga ku habboonna heegan baan u ahay, ee ha i dhibin oo ha igu tiiqtiiqsan. Dulucda tixdu, waa tamar iyo taag darro in la isku yeesin.

TOUT CE QUE JE PEUX FAIRE
MA FORCE
MON ADRESSE
SONT A TON SERVICE
N'EXAGERE PAS
NE ME PIETINE PAS

96. TARAANTARIS

RAGGII TIRISAYE
TARAANTARISAYE
KUMAA NAGA TEGAY ?
OO WAX TARI JIRAY ?

Raggii ceelka ku jiray iyo intii darka joogtayba, kolkay si isdaba jooga darka u hilliyeen, ayaa waxa laga yaabaa in shubaashii degdegsiimo socotay tamar naasnaasiday hakisay. Deeto ku hawsha ku jirray ayaa arkay in ishinku saluugtamaayo, oo u yahay si wax tabaaya cid ka maqan oo wax tari jirtay. Taasaana ku taxaabtay inuu tix tiriyuhu aragtidaas u ka maansoodo, oo u ka xogwaramo muuqaalkaas.

TOI QUI A COMPTE LES HOMMES
UN PAR UN
DIS-MOI QUI NOUS A QUITTE
ET QUI ETAIT UTILE ?

Lorsque les hommes remplissent d'eau l'abreuvoir, les bêtes se mettent à les vider. Ils commencent à se fatiguer. Les animaux s'agitent alors en allant d'un homme à l'autre. Les hommes se rendent compte alors qu'ils n'ont pas donné suffisamment à boire aux bêtes. C'est comme si quelqu'un leur manque, quelqu'un de très utile.

@SOMALIBOOKS

97. TAAWO

HADDAAN TIMO DHAQO
OON TINTIN U ROGO
TAAXATAAXADA
KOLBA REER TEGO
OO HABLAHA TOGO
TEYDA MAAHINE
TAAWADAA DHIGAY

Dan iyo xaragoba iswaaye, ayaa hore loo yidhi, ka murtida reebayna, waaka ka maansooday ee leh, haddaan is qurxiyo oon reero intoon tego kolba tii hablaha bilicsan togto taawada duunyada ka hadhay. Horena waxaaba loo yidhi, «candho dad nin arkay, tu duunyo ma eego». Taasoo ka dhigan in hawshii duunyada ee dadaalkeed loo heelanaa ay baylahday, kolkii tu ka duwan la galay, oo baashaal iyo isgayaansi salkeed yahay. Hadal murtidiis waxay tahay « laabi laba u la». Laba arimoodna tii mudan baa culeys la saaraa, ta kalina baylahsan weeye ujeedadu.

SI JE SOIGNE MES CHEVEUX
EN LES PEIGNANT
SI JE VAIS D'UNE MAISON A L'AUTRE
EN ME PAVANANT,
DANS L'ESPOIR DE PLAIRE AU JEUNES FILLES,
C'EST QUE JE T'AI OUBLIE
C'EST QUE JE NE PENSE QU'A MOI MÊME.

Travailler ou s'amuser, il faut choisir. Car à force de soigner son corps et de faire la cour aux femmes, on finit par se désintéresser du bétail.



@SOMALIBOOKS

98. OROD

WAAGAAN KU ARKABA
WAAD ORDEYSEE
MAXAA KU ERYADA ?
OO UL KULA DHACA .

Baahidu dad iyo duunyaba waa ta farta in loo xusul duubo, oo la raadiyo tabtii lagu toogo bixi lahaa. Orodkay duunyadu ku jirto, tixtiriyuhu ma garawsan la' ayn inuu yahay baahi baad iyo tu biyo, dantiis se, waa ka dhaadhicin inta hawl ishin u laaban tahay iyo garwaaqsiin, in had iyo jeer heelan loo yahay hagar tirkood.

CHAQUE FOIS QUE JE TE VOIS,
TU ES EN TRAIN DE COURIR
QU'EST-CE QUI TE POURSUIT ?
QU'EST-CE QUI TE BASTONNE ?

Les hommes et les animaux ont ceci de commun qu'ils sont pressés de subvenir à leurs besoins.

Si les animaux sont à la recherche d'herbe, jour et nuit, le berger, lui, doit leur trouver à manger et à boire.

99. SHUBAAL

WAAGA SIDA TANA,
WIILAY BUDUSHOO,
BAANATAA SHUBA,
HADDAY WEYDANA,
DOOB DHEX DHEEROO,
DHUDHUN LAA SHUBA,
HADDAY WEYDANA,
GADH MADOOBAHA,
GUGII MAALAA,
GEYDHA HORE SHUBA.

Markay duunyadu cosobka daaqdo ayey ugu biyo cab badan tahay, ka waraabkeeda galaana ugu hawl badan yahay. Ishinkana hawshiisu waaba dheeraad, oo lagu ma simaadi karo ta duunyada kale, waxaana ka bixi kara, wiil ku tababartay daajintiis iyo waraabintiis, oo siglihiisa maala, ama ku dherer iyo dhumuc isku darsaday. Haddii midkood aan la helinna nin afartanka aan dhaafin oo nan guri u hoyan, oo ishinkuu watto maala, ayaa isna kamiinta hore shuba. Geydha hore dabadeedna ishinku wuu qaboobaa oo cid kastaaba wey shubi kartaa.

PAR UN TEMPS PAREIL
QUI PEUT PUISER DE L'EAU
SINON UN HOMME ENDURCI PAR L'EPREUVE ?
A DEFAUT DE CET HOMME
QUI PEUT PUISER DE L'EAU
SINON UN JEUNE CELIBATAIRE FORT ET ELANCE ?
A DEFAUT DE CE CELIBATAIRE,
QUI PEUT PUISER DE L'EAU,
TRES TOT DANS LA SAISON FRAICHE
SINON UN HOMME BARBU
DANS LA FORCE DE L'AGE ?

Donner à boire aux bovins et aux dromadaires exige beaucoup de travail. C'est donc seulement les types d'homme cités dans le poème, qui peuvent tirer leur épingle du jeu.

@SOMALIBOOKS

100. HULEEDH

WAAN HULEEDHAY
WAAN HUBSANAAYAYE
WAAN HURDAYE KACAY

Darka ayuu sidii la rabay u buuxin, lo' iyo geel kolba kuu darka ugu jirayna markuu ku soo qamaamay, ee u wax ka dheefi waayey ayuu gasangas ka qaaday. Qabdhankii iyo orkii ka baxaayey, ayaa isna dareensiiyey in siduu filaayey u ka sii ooman yahay ishinkuu watey, oo geel ama lo' ahaa. Markaasuu isqaadqaatay una diidey nafta huleedh iyo amaarba, oo sidii laa rabay hawsha uga soo baxay.

J'ETAIS ASSIS
EN TRAIN D'OBSERVER,
JE DORMAIS,
ME VOICI DEBOUT.

L'abreuvoir rempli à demi est aussitôt vidé par les bêtes qui commencent à montrer quelque énervement.

Surpris par le comportement des animaux, il se remet au travail avec acharnement.

QEEXIDDA ERAYDA HORDHACA OO
TIRSIGA BOGAGGA LOO TIXGALIYEY
IYO
KUWA HEESAHA OO IYANA TIRSIGOODA WATTA.

@SOMALIBOOKS

ERAYDA ADAG EE HORDHACA IYO HEESAHA

KAMIIN : hamuun, gaajo ama harraad daran.
NUUXSI : meel qof joogo ama se u fadhiyo inyar ka dhaqaaqid.
MA NUUXSADAAN : sina uga ma dhaqaaqaan meesha ay taagan yihiin, ama ay fadhiyaan.
MUSHAAX : socod isku darsaday daganaasho iyo wanaag.
SURRAD : in allaale inta aqal soomaaligu u ka dhismo iyo inta dhextaal, ee la duubo. Aqal magaalona wuu la wadaagaa.
HAAMAMOOD : weelka iyo qabyada inta aan la samayn.
KU BARAAD LAAYAHAY : maskaxdiisu meel uun ku hawllan tahay, oon meel kale ama wax kale ujeedin.
CUDDAD : alaab isku xidhxidhan, sida bundadaha iyo wixii la mida ee loogu talogalo rarid.
HIIRTA : arooryada hore ee ay nan soo bixin cedceeddu : muunida
GUDOODI : socdaal lagu dhaqaaqo habeen badhka iyo wixii ka dan-beeya, laguna gaadho muunida. Marka se socodaal la bilaabo makhribka waxa la yidhaa, waa la guurayaa. Carrabuhuna wa galab socod, oo waaba ka la yidhaa, "cassar iyo carraabe waa kolba kii horeeya".
SALLAX : dhagax balaadhan oo kolka la dul maraayo lagu siblado.
LA JIIDHAY : xoog lagu maray.
DOOBTEEN : u guureen.
Si dadaba, si aan toos ahayn wax u sheegid ama u gudbin.
QEEXID : sharxid, si wanaagsan oon mugdi ku jirin wax u sheegid, ama u qorid.

---

1 - BAALUQ : qaangaadh, marka hablaha iyo inamadu ay yeeshaan astaamaha taranka.*
HAFSAD : sacab ku maalka caanaha geela iyo lo'da.
FULIN : ooffin, wax baahi loo qabo ama ballanba, sida la rabo wax uga qabashadood.
DALAG : hawl, waxayna gaar u tahay hawsha beeraha.
DARDAR : itaal dihin, inta aan lagu daalin waxa lagu hawlan yahay.
BIRICBIRIC : dhaqdhaqaaq diirdiiranaani ka muuqato meel se aan lagu gaadhin.
NAASNAASIN : itaal is dhimay oo daal u sobab yahay. Marka wax lagu hawllan yahay lagu daalo ee tamartii lagu waday isa sii dhimayso.
DAALAADHAC : istiilid, tamar la'aan wax ku fulin.
HAGARTIR : baahitir
LA MASSO AH : la mida
AGAASIN : isku dubbarid, maamul.

HAGARDAAMO : dhibaato.

2 - BOONJIDA CARRADA : fudad yaryar oo carro ah, xooluhuna ilkahooda ku goostaan.*

BADHAX : Caano iyo biyo la isku daray. Laaska badhaxa ah, laaska biyihiisu dhanaan macaanka yihiin, ee ay duunyadu ku jeel baxdo.

3 - BEERKA HA U LULIN : ha jeclaysan oo ha isa siin, hana iska dabaridin*

KU MA SII WAARTO : tu abidkeedba jiraysa maaha, tu waligeedba jiraysa maaha.

WAARE : abidkii jire, ma dhinte, Eebe.

NUXURKEED : faa'iidadeed. Wixii cuntada laga helo ee nafaqo ah, dheef.

4 - CAAGIMAYSIDE : ka gu'i meysid. Haddii qof yidhaa waxaa waan ka caaganahay, ujeedadiis waa ma cuno ama uma dhawaado. Caado, cudur iyo diin ahaan baa midkood wax lagaga caagaa.*

QADDARIIX : si degdegsiimo iyo qalbiqaatan ku jiro wax u cunid.

5 - CAAD : 1. xayaab indhaha ku dhasha, mararka qaarkoodna aragga qariya.*
2. daruuro aan qaro iyo laxaad lahayn.

CALOOL NUGEYL : adkeysi la'aan.

CAWADIIS : ayaankiis, nasiibkiis.

6 - CULLANKIIS : daraadiis, dartiis.*

7 DAYR : xilli roob leh oo u dhexeeya xagaaga iyo diraacda.*

DAGAAGILAN : nafley intuu muuqaalkeedu doorsoomay taagdaro u raacdey.

DIIHAAL : baahi iyo rafaad mudasho.

DIIHAALIN : wacdisaneyn, aan baahi iyo rafaad mudan.

HAGARBAX : baahibeel

8 - DEEQ : wax intoo lagu siiyo aan lagaaga daba iman, oon qaan kugu ahayn.*

DIRIR : 1) xidig if weyn oo naafaha ugu danbeeya.
2) Roob onkokod iyo hillaac badan.

9 - DIRRO : iskaashi*

BILLEE KUU DARUUREE : billee daruuro biyo xambaarsan oo da'a kuu yeelay cirku.

DACDA HOOSE : gunta ceelka, ama meel godan.

GOCASHO : hibasho.

10 - DAWLIS : waadaan.*

OBOS : dhul engegsan oo siigo ka kacayso.

DAR : 1) Meel ama weel biyo ku jiraan oo weel kale ama gacmaha intood galisid aad ku soo qaadatid.
2) Yeelka xoolaha biyaha loogu shubo, wuxuuna noqon karaa ku la dhiso oo la yidhaa naani ama ku harag adhi laga sameeyo oo la yidhaa naadh. Waxaana naadhka dhulka loogu qotomiyaa afar tiir oo lagu xidho, deeto intoo aad loo godo iyaa biyaha xoolaha loogu shubaa.

DUUDKA : laffaha dhabarka ee xidhiidhsan, kana bilaabma afweynta kuna dhamaada daba dhilifta.

DILLO : waa magac sac.

DAREERIN : dindimin, gororin.

DURAN : Taqaluf, iimaan daro (Xumo).

12 - DHABSI : 1) Gami iyo dhililiqood, waa naflay xoolaha dhegaha ka gasha.*
2) Kuleyl iyo haraad duunyada iskugu biira.

DHABAANDHABASHO : ruxid madaxa ku kooban, duunyaduna kolkay dareemaan in madaxa wax ka saaran yahay, ayey dhabaandhabashada waxa saaraan iskaga ridaan. Ama se wey dhabaandhawdaan.

13 - DHAADASHO : qolo aad tahay ama karaan aad leedahay ku faanid.*

TIIQTIIQSI : qof laga gar heley ama laga lib sido ku sii tumashadiis. Hadalka ood ku sii warwareentiid, ood dadkana tusaaleysid inuu qofkaasi wuxuu yahayba jirin.

DIGASHO : wiirsi.

ISLOODIN LA'AAN : sina u nuuxsan karin, qofka aan is loodin , waa ku daal ama xanuun hayo.

14 - ERGISO : wax la sii amaaneystey.*

15 - JEES : 1) Reer yar oo gooni u yaal.*
2) Dhaqdhaqaaq wax tilmaama oo naflaydu ay sameyso.

GALBINDHABAY : tegebdhabay.

GALSHO : Kolka meel biyo fadhiisna, biyihii ku jiray ay yaraadaan,

@SOMALIBOOKS

loogana boqo haddii la farafareeyo iney dhooqoobaan iyaa meel kooban (galsho) intoo laga ag qodo iliiladna loo sameeyo, lagu soo faruuraa biyaha, markaasaa laga dhaansadaa.

HOROR : 1) Wax xoog ku qaadid.
2) Jaad waraabaha ka mid ah.

MAANSO : waa wax alaale wixii qaafiyad iyo murti leh, oo u kala baxa in la tiriyo iyo in la reebo. Waxayna inta la tiriyo iyo inta la reebaa ku kala duwan yihiin luuqda iyo dhacdada (Rythem) oo inta la tiriyo u gaar ah. Sida gabayga, geeraarka, buraanburka heesaha iyo inta ay hayb wadaagaan. Inta la reebo, waa maahmaaho iyo halxidhaalaha, oon iyagu dhacdo iyo luuq aan lahayn.

16 - GEES GURACANLOW : gees maroorsanow.*

18 - RAARI : bur cawskiisa loo aayo wacdiga oo ka baxa dooxooyinka.*

GEDEF : wax qaab wareegsan leh, yaalaaba timaha iyo daaq geedaha ka hoos baxa iyaa loo yaqaan.

CEELAAN GAMASHIYIN : ceelaan biyo yareyn.

GAAWE : Gorof.

U QOONDEEYEY : u gartay inuu siiyo, la jeclaaday cid kalena aan la rabin, amaba ugu talogalay inuu qof ama neef si gaara wax u siiyo.

AYRO : neef caano badan.

19 - GOBONIMO : Sharafti.*

XIFAALO : Kaftan.

20 - GUDUUDANAHA : wuxuu ula jeedaa tixtiriyu subagga lo'da, waxa se micnaha eraygu yahay jiifaa. Waana bahal sawaabiya dinadda oo daba go' an, oo leh caman buuran oo dhogor badan.*

GAMBOOLAY : dumarka la qabo ayaa la yidhaa.

LA ISLA GACASHADAY : la isla jecleystay.

GUNNO : wax si gaar ah la isku siiyo, oo loo qoondeeyo ama loo garto qof dan gar ah inuu fuliyo laga rabo.

21 - HAAN : weel caanood saab leh oo laga sameeyo qori, argeeg ama moroh . Xiliga barwaaqo jirto caanahaa lagu shubtaa biyahana waa lagu kaydsadaa. Abaaroodkana hadhuudh baa lagu gurtaa iyo wixii kalee la helo, ee lagu kaydin karo.*

HINDHAADHIR : kolka haantu ama wixii la mid ihi u buuxsamo, ee u yar iqan yahay, codka kolkuu waxaasi ruuxmo u sameeyo, ayaa hindhadir la yidha

CEEGAAG : weel caano, biyo ama subag ka buuxo oo afka wixii ku jiray

u taagan yahay, ama meel godon oo biyo fadhiisin leh, sida dhijaanta, ama harta oo iyana kolkuu roob u da'o fatahaad ku dhawaata. Aad u buuxsamay.

MAR ABAARI DHAHARATAY : Mar abaar aad u ba'ani dhacday.

22 - YAAD HABAABINE : yaad hallaabine.*

HAWGA : hungunka iyo shanqadhdha. (Sanqadhdha).

HIMILO : wax in la gaadho la rabo oo dani ugu jirto ka qoorshaha u dhigtay.

TAB : Farsamada wax lagu qumiyo, (method) lagu hirgaliyo, ama loo sameeyo.

LA MA HURAAN : waxaan laga maarmayn, laga fursanayn.

XEELDHEERE : qof oqoon gaar ah u leh wax, lagana waraysan karo, ama laga la tashan karo.

U HORSEEDI : U horkici.

DHIIJIS : kolka intoo naasaha midkood la yar tuujiyo in yar oo caano ah laga sii daayo. Naasaha dumarkuna waa la masso.

UGU DIBJIRID : hawl iyo dhibteed oo qadoodina ku darsatay u galid.

SAYMO : meel dhibaato dagaal ka taagan tahay oon la mari karin. Buur aan la mari karin.

SUUN : 1. meesha buuri ku af beesho ama ay ku dhamaato.
2. ur.
3. suunka dhexda lagu xidho.

23 - HADH DABACSANE : Hadh qaboobe.*

HANGAL : Asay, agal, dhar mawdow ama dhar cad bey noqon kartaa. Haweyneyda soomaaliyeed waxay hangasha qaaddaa marka ninkeedu dhinto.

HALTAGE QABE : hantaaq qabe.

HAD UUN DILI : mar uun aarsade.

SEYGEED : ninkii qabay.

SHU'O : wax alaale wixii la xumaysto ee loo arko inuu wanaagba ka fog yahay.

LA SHU'AYSTO : Loo arko inuu nan wanaagba lahayn, xuma mooyee samo ka fog .

@SOMALIBOOKS

SHU'AALE : Dhinac ba'an had iyo goor ka wax eega. Lidkiisuna waa SADAALE, ka dhinaca san wax ka eega, ka wax san uun fariya.

24 - ANNA HAYLKAYOW : kii ii suntanaayee aan lahaayow. kii lexejeclada aan ka qabow.*

HILLAN : wax wax la dul saaray, raran, waxaan had iyo jeer ku gaadhnahay qalab hawleedka, wakhti aan ku nastana ma lihi.

MEEL FAALALSAN : 1) Meel baaxad weyn leh oo lagu baahi karo. Amaba si fiican ugu fillaata danta laga leeyahay.

2) Faalalsanaan, wakhti haysasho wax lagu qabto ama lagu nasto. Faalalsanaanta ku jirta sharaxa tixduna, waa haysashada wakhti badan oo lagu nasto ama dan lagu qumisto aan ta duunyada ahayn.

25 - HOOGE : Ba'e.*

HORDHAC : 1) Hortaba dar galidda.

2) Arar, gogoldhig.

ISKU HALLAYN : Kalsooni ku qabid, (ku kalsooni)

26 - HOOTO : Gabno, baaqimo, aan caano badneyn.*

ISKU MA HABANA : Isku ma habboona.

ISMANA HURAAN : Ma kala maarmaan.

HORMO : Inta darka mar wada gasha.

HULEEDH : Is dhigasho, hawl loo diyaar ahayn, caajisnimo.

YAAYUUL : Qaylo iyo qaxar badan.

HADHAALE : Maahays, neef aan la socon karin xoolaha kana gaabiya.

FEEJIGNEYN (FOOJIGNAYN) : Aan digtooneyn.

WAA LA HATIGAA : waa la hayaanadeeyaa.

LA MASO AH : La mida.

ASAAGIIS : inta la mida. Aynigiis, faciis.

XASSARAD : daandaansi :

HATIGAAD : hayaanad, huruuf.

HADDA :wadka

DAHDA : qarisa

SUURAGAL : (SUURTAGAL) Waxa Dhici kara ama runta u dhaw.

27 - HIRDI :gujo dagaal oo xoolaha u gaar ah.*

28 - HUBIN : wax aan si wanaagasan looga warqabin, u kuurgalkiis iyo wacaal raadintiis.*

HORSEED : sahan

LOO MA HAADSHO : loogu ma baaqo.

HAWIRANTAA : wey luggo'daa.

@SOMALIBOOKS

29 - ILWAAD : 1) Magac sac.*

2) Aragti san, arag qurxoon.

CALAACAL : Kolka qof dhibaato gaadho hibasho hadalka iyo sii hadal haynta siday wax u gaadheen.

ARAR : sii daajinta xoolaha inta ceelka la geyn.

CABASHO : Si liidnimo ku jirto kolka qofku wax gaadhay ama baahidiisa uu u sheegto, taasoo taag la'aani u sal tahay.

30 - KAYD : wax meel la dhigto oo in lagu toogo baxo baryo danbe loogu talo galo.*

KAL : Kolka meel dan laga leeyahay qofba markiisa u galo, Waraabka xoolahana waa la kal galaa.

31 - RAGGA U KULUL : Ragga ugu firfircoon.*

KALDAMBEED : Jiilaal dabayaaqdiis oo naq la sugaayo, ama xagaa dabadiis oo naq la sugaayo.

KALIIL : xilli kulayl badan, oo kala soora jiilaalka iyo guga.

OORI : xaas.

OORIDIISA : xaaskiisa.

KUWA U DOOR BIDAAYO : Kuwa u is leeyahay wixii la faro siduu yahay bey u qaban, kana baylihi mayso hawshu.

LIS :1) Caano markaa uun la soo lisay oon dhadhan doorsoomin.

2) Maal.

DUMMAD : 1. mas' uuliyad.

2. dinnad, basho.

KA INDHOSAABTAY : ka indhotirtay.

GOOBAABIN : Wax qof la faraayo inuu falo waliba lagu adkeeyo inuu sida la rabo u yeelo.

DABAYAAQO : Dhamaad.

KAGA KAAFTOOMA : Kaga maarma.

MARWO : Ruux dumara oo la qabo.

32 - LAAFYO : socod qurxoon.*

LAAS : meel durdura ama biyo dhaw oo intoo battaaxa ama burciidda faraha lagu yar qodo biyo laga la soo baxo.

WALAF : waxa intoo la falo aan laga hadhin oo had iyo jeer la falo ama lagu kaco." Samaale akhriska wuu ku walfay".

KU HAQABBEELAYEEN : Ku hagarbaxayeen.

KOLLABA : marraba.
TUSMO : tusaalo
LAGU SIMAADI : lagu sheegi karo inay la mid tahay.

35 MAYDHAQ : saddexda feedhood ee u danbaysa iyo hilibka ka lusha ayaa la yidha maydhaq, waana ka lo' da, ta adhigana waxa la yidhaa sarar.*
WUU MUUDSAMAY : 1. dheecaan iyo muuq wixii ku jiray ayaa ka dhamaaday oo wuu dhadhay.
2. wuu taag dareeyeyna waa la yidhaa.
MUUDSASHO : Debnaha, carabka iyo langadhaxa iyaa si wax la nuugaayo intoo la yeelo wixii muuq ama dhadhan la jeclaysto leh laga la baxaa muuqa.
OOGADA NAFLAYDA : korka naflayda.
OOGO : dhul sareeya oo qabow.
ARLO : dhul.
KIBID : cidhiidhi galin, dhibaato ku hayn.
KIBTAY : dhibaato joogto ah u geysatey.
DALIIL : 1) marag kac, markhaati, caddayn.
2) liitaa asaagiis hadal iyo tamar toona aan iskaga caabiyin.

OOGO GIIGSAN : korka naflayda oo sigibtiran, naaxsan, shushubo aan lahayn.

36 - MIISAN : 1. magac sac.*
2. qof degen oon qalqaalli ahayn.
3. qalabka wax lagu miisamo.

MAAX : Kolka laas ama ceel . Biyihii ku jiray laga dhurto dibna biyo kali ilihiisa uga soo baxaan, iyaa lagu sheegaa biyaha dambe maax.
MIYIR LAAYAHAY : kala garasho la' aan, qof waalli lagu sheegi karin, hase yeeshee dhaqdhaqaaqiisu u waalli sawaabiyo. Qof suuxdin ku maqan, wuu miyir laayahay waa la odhan karaa.

38 - MIDADAWSI : ku noqnoqashada duunyadu biyaha ku noqnoqoto, fiitis.*

39 - NAANI : marka xoolaha la waraabbinaayo iyaa biyaha loogu shubaa naani ama naadh. Naanida, waxa laga sameeyaa hargaha weylaha, haddii la waayona shiraac, naadhana, waxa laga dhisaa dhagaax iyo dhoobo.*

@SOMALIBOOKS

40 - ILWAREEN : indho xanuun.*
INDHO HADOOD : indho xanuun ilin iyo iftiin eegid la 'aani u raacday.

41 - EDEG : 1) Xerada maqasha lagu xereeyo, boos.*
2) Weel duugoobay.
3) Meel laga guuray oo jabad ah.
QALFOON : meel baryo hore laga guuray oo mar labaad dib loo degey baali.
BOOS : 1. caddaan,
2. kolka weelku midabkiisu is rogo oo u cadaati noqdona waa lagu sheegi karaa.
QOYS : halkan ujeedeedu waa reer jeesa.
QISHINO DUMAR : haasaawe dan galmoosho ku jirto.

42 - RADIN : qolka shinidu ku samayso malabka. Taasoo noqon karta geed jirid weyn oo dhuuxa ka daloola, ama dudumo sidaa u weynayn gudaheed. Meesha se loo sameeyo gaaguri baa la yidha, waana halka shinidu ku samayso malabka.*
RAARI : Waa nooc ka mida tigaadda lo' duna jeceshahay.

43 - REEBI : col yar oo tuugaysi habeenkii wax ku laaya.*

44 - RAMASH : nooc kasta oo doogga ka mid ihi kolkuu baxo iyaa la yidhaa.*
DHAADASHO : faan.
DHALIIL : waxa sida laga rabo aan wada ahayn, oo la yar liido, wanaagiisu se badan yahay.

45 - MADAL : 1) Fagaare, balan meel lagu qabto oo la iskugu yimaad.*
2) Dhul dhibaato dagaal ka taagan tahay.

46 - SI WALBA : nooc kasta leh. Si kasta.*
MUTAYSTO : wanaag iyo xumaan kolba kuu galabsado wuxuu ka helo ee abaalkiisa.
WAXBA KA DHEEFAYN : wax faa' iido ama manfac leh ka helayn.
TOOGGO : baahi wax loo qabo
DARYEEL : baylah iyo daranyo, ka ilaalin ama ka hirid, sida ku farsan nool iyo moodba uga warhayn.

HAGARBEEL : baahi bax.

47 - TAADHI : sanad walba kolkuu ishinku dhalo, ayaa neefku wuu taadhiyey la yidhaa.*

48 - WEYWEY : kolba in qaaday.*
wuu weyweyey : kolba in buu qaaday
WARAY : kolka duleedka reerka wax lagu siiyo duunyada abaartu liciifiso.
AMHIN : neef loo carbiyey in la iib geeyo. Ama se la qasho.
WACDI : abaar ama wakhti dhaqaaluhu u liciifsan yahay.
U MAQAAMANA : u diyaara, heegan u ah
URQUUN : cunto.
HUMAAGSI : 1) sii eegista wax aan si fiican loo arkayn.
2) Waxaan ku hor joogin oo muuqaalkiisa lagu hor keeno.
LAAFID : Itaal darrayn.
URQUUMIN : cuntaysiin, ama cunto siin.

50 - DIIF : daal, caato.*
WALAAC : go'aan gaadhis la'aan.
WAARIS : socod waayeel da'weyn.
EEDAAD : dhibaato silic iyo saxariir laga mutto, ama ku dhaxalsiisa.

51 - WAABI : si wax wax ku dhufanaya yeelid.*
KU TAAGSADAY : wuu u xoog sheegtay, wuu ku muquuniyey xooggiisii.
WAHSI : jiif ama fadhi uga kicid la'aanta wax la rabo in la qabsado, waxaana u sobab noqon kara caajisnimo, xanuun iyo da'.

52 - XIGAALE : inta isku jilibka ah ee mag iyo qaadhaanba wada bixisa.*
XIDID : inta guur isku keeno ee isqadarintoodu la ma huraanka tahay, ee ay reeban tahay dhaqan ahaan in lagu xadgudbo, wixii gefee kaaga yimaaddna loo dulqaato.

53 - AFAR FOOLLE : Ilmaha laba iyo tobanka bilood jira, ee afarta fool u soo bexeen ilko kalena aan lahayn.*
ABEEDINIYAAY : koriyaay.
AALAABA : yaalaaba
GABLOOSHO : gudho.
GODOL : marka naflayda dhidig ee irmaan naasahooda caano ku soo dhacaan, ee maalis ama jaqid ku habboon yihiin.
54 - AWLAX : waran kooban.*

@SOMALIBOOKS

ISA SOO TUGTAY : isa soo taagtay.
FILAAYEY : dhawraayey. Beegaayey.

55 - AXDI : balan adag.*
LA MAALO : la liso.
OON (DH) : wax la cuno oo dheef leh, cunto.
OON (L) : harraad*

56 - ABEER : ishin.*
IB : daloolka yar ee naasuhu lee yihiin ee caanuhu kolka la maalaayo ama la lisaayo ka soo baxaan.
Halka kaadidu dad iyo xawayaanba ka soo baxdo.
U HUR : Deeq ahaan u siin.

57 - KARIN : awr rarooye ah.*
IRMAAN : inta duunyada cano laga liso ama laga dhaadhyo leh.
LAGA DHEEFIN : laga helin.
LA MUTAA : waxaan la filayn in loo baahan oo baahi kuu qabato.
GABNO : Neef caano yar ilmihiisa se ku filan.
LA DARISTAY : la soo gudboonaatay.
HIBASHO : Dhibaato ku gaadhay sii hadalhaynteed oo calaacal ku lamaan yahay.

58 - BIDO : ruux dumara oo dhibaato badan, oon laga sabato bixin.*
BARGARAD : qofka ku fara adeyga maalka u haysto een sina uga faa'iidaysan.
WAXA KU XAMBAARAY : waxa ku kallifay . Waxa ku taxaabay
XAYNDAABKA DHAQANKA : sida dhaqanku jideeyey.
YABADH : waa gargaar wiil ama gabadhi reer kooda ay ka hesho ama u ka helo..
XADHIG LA MA SITAAN : ku sina loola dhaqmi karin, gurac.
UURKUTAALO : murugo.

59 - U BALDHINAYAA : u hiloobayaa. U xiisoonaya*
URQUUN : dhuuni.
QOTON : ceel laba shub ka badan ama se laba qof in ka badani shubto.
DIIF : daal, ama se gaajo raadkeedu u ka muuqdo, oogada naflayda.
GACASHI :gayaansi.
U BUSEYLAY : u xiisooday

L : dhawaaq lab leh.

DH : dhawaaq dhidig leh.

60 - HUGUN : bullaan.*
DULUCDA : hawraarta, ujeedada.

61 - IDIDIILO : rajo.*

62 - CATOOTI : wiil buuran oo cad blaqsan leh.*

63 - CALOOLYOW : ku uursamayn.*
ASAAGIIS : Faciis. Filkiis.
WABAX : Oon beel.
FULAY : Dantiis intuu qumistay u xamaan qaatay inuu ku tooso dan u laaban, ama hoygiis, badanaaba kolkay xooluhu ka cabbaan dar iyo durdur, kolba kii loo arooriyo, ee ay u jeestaan tubtay ka yimaadeen baa la yidhaa, duunyadii wey fushay.

64 - CEELALYO : inta sii sahamisa meesha loo aroor tegaayo, siina hubisa ceelba ceelkuu ka biyo badan yahay, ee hawsha sii badh qabata.*

CIIDAN : rag kuu sii adeega. Gacan yare ama qof kuu shaqeeya, midiidin.
U XUSHA : u togta, u doorta.
SIINA HUBISA : siina bilkeedisa.
HUNGURI JUQJUQ : gesenges.

65 - KAALIN : inta shubaysa ceelka qotonka ah qofba meesha uu kaga jiro hawsha ama halka ceelka guntiisa u ka joogo.*
CILLALAY : ku ligay, wuu igu cillalay, wuu igu ligay.
GAYISIIYEY : baday

66 - DUUF : duunyo ama ogaadh aan la gawricin oo iska bakhtiday.*

67 - KIBBAAR : neefqabatow.*

68 - LAWGA : jilibka.*
XAALLAYN : danayn.
KU CAANBAXAY : lagu yaqaan

@SOMALIBOOKS

69 - DHAAN : muur intoo weel biyood la saaro lagu arooro oo biyo lagu soo dhaansado.*

70 - DHAASHI : dufan la marsado wajiga, si cawlka saabuuntu dadka kaga reebto wajiga iyo gacmaha la iskaga bi'iyo, ama se meeshii hawo engegsan ee lagu xarqo leh iyaa wajiga iyo gacmuhu si ay nan u dildilaacin baa loo marsadaa ama loogu dhaashadaa subag , saliid ama se wixii duffan leh:*
DHEEF : waxtar, faa'iido.

71 - FANKA : sabarka, hilibka ku yaal caarada miskaha, ilaa iyo kalyaha, fardahaana hilbkaas ku qurxoon.*
BAACSI : kolka wax la eryanaayo laga hadhi waayo.(hiiraansi)
CAASHA : fuqa hoose ee xayawaanka." xawayaanka "

72 - FARTA BIDIX : geesta bidixda.*
FIDHMAW : ba'aw, hoogow.
GEDDAA : sidaas oo kale.
FALI : sameyn.
FILAYN : dhawrayn, sugeyn.
LA BAAXAADEGAAYA : la kaacaa kufaaya. La daalaadhacaaya.
TASHIIL : wax kala reebasho, yaryaraysi.
FADHOCIN : Is bandhigidda iyo istustuska dhalinyaranimada iyo waayo arag la'aantu la timaad.
MILICSADAY : bildhaansaday, si yaroo fudud isha ula raacay.

73 - GANTOOBAN : aad u gaaban oo isku cuffan.*
GIGAN : meel ama wax kor loo eego oo lagu hunguri jabo, qoortuna ku daasho oo si qumman loo eegi karin.
MEEL GOTINA : meel aad u sii godan oo luuq hooseeya ah. Waxa lolal jeedaa ceel af yari iyo gundheeri isku darsaday.
MA GANI KARO : kor uma tuuri karo, ama uma bidhi karo.
LA GARWAAQSADO : la garawsado.
GESENGES : qalbiqaatan.
AFEEF : hadal marka talo, gar ama arimo kaleba lagu jiro, ee laga mala baqo in sida habboon si aan ahayn wax u dhici karaan lagaga sii hordego, oo shuruudi ku lammaan tahay.

74 - GUNNAHA : gunta hoose ee ceelka.*
KU NAALOONAYA : ku faraxsan, ku niyadsan ama ku caloolsan.

TABAABULSHO : qabanqaabo.

75 - GAR IYO DHIXIDH : ujeedadu waxay u dhacaysaa garays iyo googarad.*
QABDHAMAYA : qalbiqaatamaya.

HABEENKAAN GUDO : habeenkaan saqda dhex hablo doonto.
GEYAAN : dhidigoodka intooda meher kuu qaban karo.
XUGUN : shahwad.
KALA DHANTAALAN : wax ka maqan yahay. Aan dhanneyn.
MEHANOW : ciirsi la'aan.
Wuu eersaday : wuu eeday.
Galmadii : u galmooshihii, gayaansigii, u tagiddii.

76 - GABAAD : meel dugsoon.*
GAANO DUMAR : ruux dumara oon rimanayn.
WUXUUN BUU KU TAGOOGAN YAHAY : wuxuun buu ku hawlan yahay.
MIDIIDIN : ciidan, adeege.

77 - GUUTO : Col dagaal galaya, qaybihiisa qayb ka mida oon yareyn.*
GALBAY : Libidh si loo gaadhaana adag.
GADOOD : ka dhiidhiyid.

78 - HAYB : tohoyasho, ku haybsaday, ku soo tohoyday. Laba mid beyna noqon, raadinta qof qoladuu yahay ama halkuu ku sugan yahay iyo xaalkiisu siduu yahay.*
KU HAYBSADAY : Ujeedada laga leeyehay waxay tahay inkastoon kaa maqnaa haddana raadkaagaan ku soo joogoo waa anigan imid.

KU TAAMA : ku fikira, ku hamiya.
MAQAAMAN : u diyaara, heegan.
QUMIN / Fulin, sida ku habboon wax u qabasho.
LOO QOONDEEYEY : loo gartay, loogu talogalay.
KU EEDAN YAHAY : ku maqan yahay.

79 - HAFSI : sacab ku malka caanaha.*
MAAXDA HIGILKA AH : maaxda ceel aan biyihiisa muddo dheer laga cabin oo ay qabow yihiin.
HIGIL : muuqaal madow oo wuxuu yahay aan la sheegi karin.

@SOMALIBOOKS

WIYEER : biyo dhadhakooda iyo midabkoodu isbadaleen ?

80 - HARO : meel biyo fadhiisina oo la sameeyey.*
MA HILIYEY : ma buux dhaafiyey.

81 - HAYDALI : hiigmay, taagdareeyey.*
HAYDAAL : caato, taagdaro.
BAASHAAL : wakhti is dhaafin.
KAKAN : aad u adag, dhibaato badan.

82 - HUUMO : guumays.*
DARANDOORI : si isdaba jooga oon nasasho lahayn wax u qabasho.

83 - HALACSI : bildhansi, waa aragti si fiican aan looga bogan wixii la arkaayey.*
HILLAAB : wax huwasho aan isdad ahayn, gacmuhu se qarsoon yihiin, madaxuna u muuqdo.
HAMBALAQ : hore iskugu ridid.

84 - HIRDAMAY : dagaalamay.*
HOOGEY : ba'ay oo baayaafay.
BOOLI : wax la soo dhacay, ama xeer daro lagu helay.
HOOBTEEN : ku idlaadeen, aad loogu dhintay.
CIIRSI : taageero.
SALEELO : dhayal.

86 - MADI : 1) nin walaalo innamo ah aan lahayn.*
2) neef aad u caano badan, baaqimo.

87 - MAKHADAYN : 1) sheeko wakhti lagu qaato oo xiiso leh, kana dhaxaysa dhidigoodka iyo labka.*
2) waranwaryo, isku dir.
MAAMA : madow guxul ah. magac halaad.

MADDEYN : kolka maaxda hore ceelka laga dhamaysto ee kolba inta yar ee soo maaxda laga dhuranaayo iyaa la yidhaa waa la maddeynaayaa.

88 - MITAMIN : tashiilid, yamxeerin.*
SOO HIRO : soo hormo oo walwel la'aan ku cab.

89 - MIRMIRO : cududo, taag.*
MAYRAC : galab daajinta xoolaha.
MAQAAMAN : Heegan.

90 - NAQ : doog, tigaad.*
KA BURSADO : ka badsado inta u wax la wadaagaayo, ama u la qaybsanaayo.

91 - RIGO : aad u adag.*
RAGGU ALKUMAY : raggu dhisay ama sameeyey.

92 - RIBAD : biyo dhoqaysan oon miirrayn.*
SAGAL : 1) leexo, siiso, siigada kolka la socdo cagaha ama qoobabku ay kiciyaan.
2) markay cedceeddu soo baxayso ama se ay dhacayso midabka qurxoon ee iftiinkeedu sameeyo.

93 -SALOOLANE WIIL. wiil muruqyada iyo seeduhuba hawl ama si kale ku adkaadeen.*
SI RAG : sida ragga.
SED : calaf, waxa naflayda eebe calaf uga dhigay si gaar ahna ugu qoondeeyey.
KA SEDA : meel wax laga bixinaayo ama laga qaybinaayo wax uga qabta, wax ka siiyaa.
GUUL : 1) Habeenka duunyadu ceelka ay ka biyo cabidoonto la dul seexsho.
2) Libin.
3) aan guullo: wadajir wax aan u wada qabsanno.

94 - SUFTI : nin jidbo ciyaareed gashay.*
SIGLE : dambar neef ugub oo lo'ah ama geela.
SARAR : feedhaha iyo hilibka raacsan.
SIRINSIRQOW : si wax sakhraansan, ama wareersan noqosho.

95 - HA IGU TURAN : ha igu soo jeedin, ha igu soo taagnaan.*
TURASHO : marka wax cid ka rabtid oo haddii laguu diido adoo helo mooyee talaba ay nan taada ahayn.

96 - TRAANTARIS : wada mar, kolba mid mar, kolba mid u tagid. Lidka eraygu waa talantaali oo ah mid dhaaf.*

97 - TAAXOTAXO : xarago.*
TOGO : xulo, kala dooro.
TAAWO : hawl, dalag.

98 - HADH : duhur.*

99 - BUDLIN : marka wax sida hadhuudhka ah intoo tib iyo mooyo loo qaato, ama makiinad la galiyo sida daqiiqda laga dhigo. Daqiijin.*
WIILAY BUDUSHAY HAWSHU : wiil hawl ku taba bartay, nafta iyo oogadiisuna ay qabatiimeen.
BAANATAY : cunto dheef le ay siisay.
GEYDHA HORE : kamiinta hore.

100 - HULEEDH : fadhi is dhigasho ku lamaan tahay,*
DHUDHUN LEH : xooggan.
GEYDHA HORE : Kamiinta.
AMAAR : caajis.
OR : dhawaaq dheer oo naflay wada joogtaa mar qudha ku wada dhawaaqdo.

@SOMALIBOOKS

OUVRAGES CONSULTES :

- Andrzejewski, B.W.
the art of miniature in Somali poetry
Reprinted from, African language
Volume 6
pp 5 - 16 (1967).

- Andrzejewski, B.W. and Musa H. I (1963)
A. Somali poetic combat
Journal of African language
Volume 2
pp - 15 - 28, 93 - 100 and 190 - 205.

- Andrzejewski, B.W. and Innes
Reflections of african
oral litérature
Reprinted from African language Review
Volume 1 - (1975).

Andrzejwski B.W and lewis I. M (1964)
Somali poetry : and introduction
Oxford
at the Clarendon press.

Henige David (1982)
Oral Historiography
London - New-York.

Finnegan Ruth (1977)
Oral poetry :
its nature significance and social contex
Cambridge University.

I. M. Lewis
Pastoral democracy
London (1961).

I.M. Lewis
Peoples of the Horn of Afica (1969). by I.M. Lewis
London. International African Institute.

Wassaaradda waxbarashada iyo barbaarinta (1976).
Suugaanta - Fasalka Afraad.

R. C. Abraham,
Somali English Dictionaray
University of London Press LTD.

Yaasiin C. Keenadid
Qaamuuska af - Soomaaliga
Wassaaradda hiddaha iyo taclinta
sare, Akadamiyaha dhaqanka
Guddiga af - Soomaaliga
1976.

Dhamaan dadka ku qoran boggani waa kuwii aan ka soo ururinay heesaha iyo kuwii naga caawiyey sharaxa, waxayna degen yihiin Jamhuuriyadda jabuuti. Da' dooduna wa soddan ilaa iyo todobaatan jir.

Les personnes dont les noms suivent m'ont aidé dans le commentaire et le recueil de ces textes. Elles résident toutes dans la République de Djibouti.

Abdi Djama Barré
Hadi Miguil
Abdillahi Omar
Goumaneh Arayé Ali
Aden Ali
Ibrahim bahdon Jilané
Ahmed Aden
Miguil Osman
Ahme Awaleh Kadiyé
Migané Osman
Ali Koul
Mohamed Waïss
Awalé Ibrahim
Mohamoud Gueldon
Barré Houffané
Moumin Miguil
Elmi Kahin
Osman Ibrahim
Farah waïss

@SOMALIBOOKS

Salah Miguil
Guirreh Dharar Roblé
Souleiman youssouf
Hassan Elmi
Waberi Farah
Hassan Galeb abtidon
Waïss Galeb Abtidon
Waïss Eyeh
Hassan Roblé
Djamac Mouse
Omer God bouh
Meydhane Adane Khayre «Goobaale»
Okiye Iltire «Hanahaaban»

@SOMALIBOOKS

AGENCE DE COOPERATION CULTURELLE ET TECHNIQUE

Principale Organisation Intergouvernementale de la Francophonie, l'A.C.C.T. dont le siège est à Paris, a été créée en 1970 grâce à la volonté de plusieurs pays conscients de la solidarité qui les lie à travers l'usage de la langue française. Parmi les mission qui lui ont été confiées par ses 41 Membres la promotion des cultures nationales et le rayonnement de la langue française occupent une place de choix.

Après les trois sessions de la Conférence des Chefs d'Etats et de Gouvernement des pays ayant en commun l'usage du français tenues à Paris en février 1986, à Québec en septembre 1987, et à Dakar en MAI 1989, l'A.C.C.T. a Développé une politique dynamique de promotion du livre afin de rendre cet outil accessible à toutes les communautés qui composent l'ensemble francophone.

LES PAYS MEMBRES DE L'A.C.C.T.

ETATS MEMBRES :

Belgique - Bénin - Burkina Faso - Burundi - Canada - République Centrafrique - Comores - Congo - Cote d'Ivoire - Djibouti - Haiti - Liban - Luxembourg - Madagascar - Mali - Maurice(Ile) - Monaco - Niger - Rwanda - Sénégal - Seychelles - Tchad - Togo - Tunisie - Vanuatu - Vietnam - Zaïre -

ETATS ASSOCIES :
Cameroun - Egypte - Guinée-Bissau - Laos - Maroc - Mauritanie - Sainte - Lucie.

GOUVERNEMENTS PARTICIPANTS :
Nouveau - Brunswick - Québec.

1ère édition
28 juillet 1987
dépot légal N* 48

2ème édition
30 mars 1992
dépot légal N* 423

Reproduction interdite
(partielle ou totale)

**AGENCE DE COOPERATION
CULTURELLE ET TECHNIQUE**

513, quai André Citroën 75015 Paris : 45.75.62.41
télex : agecoop 201916 F

@SOMALIBOOKS